FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

Waxa la soo saaray 11kii Bishii 2aad ee 2009

## Warbixin Gaar ah - Falanqaynta Deyrta '08/09 Kadib

Warbixintan gaarka ah ee FSAU waxay soo koobaysaa natiijooyinka ugu muhiimsan ee Qiimaynta iyo Falananqayntii Deeyrtii 2008, taasoo ka soo baxday hawlo draasadeed laga sameeyey (21kii bishii 12aad – 1dii bishii 1aad), waab daraasadeed heer gobol iyo qaranba ah oo lagu falanqaynayay (2dii –23kii bishii 1aad) iyo Kulamo ku saabsanaa Xaqiijinta Farsamada iyo Su'aal bixinta Hay'adaha la la iskaashado (Nafaqada 22kii bishii 1aad, iyo Hubinta Cuntada 27kii bishii 1aad). FEWS NET Somaaliya iyo 31 hay'adood oo la iskaashado , oo ay ku jiraan maamullada heer gobol, hay'adaha Qaramada Middobay, hay'adaha caalamiga iyo ururrada Maraxalliga ah ayaa ka qayb qaatay ama taageeray howshan qiimaynta iyo falanqaynta Deryta Kadib. FSAU waxay ku soo bandhigtay natiijooyinkaas Kulan lagu qabtay 30kii bishii 1aad Xoghaynta Taageerada Soomaaliya ee magaalada Nairoobi, waxaana ay soo saartay War Saxaafadeed 5tii bishii 2aad. War saxaafadeedkaas iyo bandhigaas lagu sameeyey natiijooyinka waxa laga helayaa Websaytka FSAU.

- Cimilada
- Colaadda Sokeeye
- Beeraha
- Xoolaha
- Suuqyada
- Nafaqada

### Natiijooyinka Ugu Muhiimsan

Natiijooyinka qiimaynta xilliga Deyrta '08/09 ee FSAU, FEWS-NET, iyo hay'ado ay isbhaysteen waxay xaqiijinayaan inay ka jirto **Xiisad Bina-aadamnimo oo sii kordhaysa Soomaaliya, iyadoo 43% isku darka guud ee dadweyna dalka, ama ilaa 3.2 malyuun oo qof ay u baahanyihiin taageero gurmad ah oo hab-nololeedka iyo badbaadinta nolosha ah ugu yaraan ilaa laga gaadhayo bisha 6aad ee 2009.** Soomaaliya oo dawladnimadeeda lagu guulaysan waayay ilaa billowgii sannadihii 1990nadii, waxa soo food saaray gurmadyo bina-aadamnimo oo soo noqnoqonayay 18kii sano ee la soo dhaafay, waana dal ku can baxay nafaqa darro heer sare oo ka sarreeya heerar gurmada, iyo sugid la'aanta cuntada joogtowday kana jira dadka reer miyiga ah. Hase yeeshee, xiisadda bini-aadminnimo ee sii socotaa waa mid ka duwan kuwii hore oo baahsan, oo saamaysay 1.2 malyuun oo qof oo reer miyi ah, tiro ku dhow saddexdii meeloodba laba meel oo dadkani ah ooy dhibaatadu haysato ama 2 malyuun oo qof waa dadka saboolka ah ee deggan magaalooyinka iyo dadka gudaha dalka ku barokacsan (Khariidadda 1 iyo Sanduuqa 1).

Arrinta ugu weyn ee ka dambaysa xaaladda hadda waa dhibaato xagga dhaqaalaha ee ka dhalatay qiimo dhaca ballaaran ee ku yimi Shilinka Soomaaliga iyo sicir bmararka weyn ee ku saabsan qiimaha cuntada iyo wayaabaha kale ee lagama maarmaanka ah. Dhibaatada dhaqaalaha waxa sii xumeeyey bilo ay colaaddu sii korodhasay oo keenay inay gudaha dalka ku barakacaan dad ka badan hal malyuun oo qof oo dhammaan ku sugan dalka gudihiisa. Waxa intaas dheer, roobabkii xilliga Deyrta (Bilihii 10aad –12aad ee 2008) oo aad uga hooseeyey heerka caadiga ah. Tani mayna sii qoto dheeraynin oo keliya abaartii xumayd iyo gurmad bini-aadminnimo oo hore uga jiray xoola-dhaqatada gobollada dhexe, balse waxa ay keentay sannad kale oo wax soosaarka beeruhu ee sannadeedka uu caadi ka hooseeyey iyo in guud ahaan uu dhinmay helitaanka miraha beeraha 120,000MT. Baaritaannada nafaqqadu waxay muujinayaan heer nafaqo-darro darani oo gurmad ahi inay ka jiraan dhammaan Soomaaliya, taasoo ay keeneen arrimo is weheshaday oo ay ka mid yihiin xaaladda sugnaanta cuntada oo ka sii daraysa, barokaca sii kordhaya nabadgelyo-daradu keentay, cudurrada faafa oo aan la xakamayn iyo la'aanta adeegyada lagama maarmaanka ah. Carruur tiradooda lagu qiyaasay 200,000 oo ay da'doodu ka yartahay 5 sano oo ku sugan Soomaaliya ayay haysaa nafaqa-darro xumi, kuwaas oo 60,000 ay hayso nafaqa-darro aad u daran oo halis ugu jira inay geeriyoodaan haddii aanay helin daryeel habboon oo aqooni ku dheehan tahay . Lixdii carruur ahba mid ayay haysaa nafaqa-darro, labaatankii carruur ahna hal ayay haysaa nafaqa-darro aad u xumi. Tiradaas badani saamayn xun oo muddada dheer ah ayay ku yeelan doontaa dhaqaalaha dalka aayaha dambe.

***Xiisadda Hubinta Cuntada ee Magaalooyinka***

**Xiisadda sii kordhaysa ee ka taagan cuntada magaalooyiku** waa mid ku baahsan Soomaaliya oo dhan, taasoo saamaynaysa qiyaastii 22% tirada guud ee dadweynaha, ama **705,000 oo qof.** Tiradan guud**, 565,000 oo ka mid ahi waxay ku jiraan Xiisad Cuno iyo Hab-nololeed oo Aad u Xun (XCHAX)** waxaana ay u baahan yihiin taageero gurmad ah oo hab-nololeedka ah, **140,000 oo ka mid ahina waxay ku jiraan Gurmad Bini-aadmminnimo** oo waxay u baahan yihiin taageero gurmad ah oo hab-nololeedka iyo badbaadinta noloshaba ah. Waxa intaas dheer, jiritaanka 1 malyuun oo qof oo cusub oo ka soo barokacay colaadda sii kordhaysay ee jirtay labadii sannadood ee ugu dambeeyey, iyo 275,000 oo qof oo muddo dheer gudaha dalka ku barokacsanaa, dadkaas oo ay iyana sidaa si la mid ah u saamaysay dhibaatada sicir Baraka cunnadaee sarreeya. Fursad-u-helidda cuntada ee dadka saboolka ah ee magaalooyinka deggan ayay si weyn u koobtay maaddaama ay dadku halgan ugu jiraan inay fuliyaan baahidooda cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah iyadoo isla markaana uu soo food saartay qiimihii ugu sarreeyey ee cuntada ee la diiwaan geliyey taariikhda. Qiimaha bariiska dibedda laga keeno iyo miraha beerahadalka wuxuu korday 200% iyo 400% lixdii bilood ee u dambeeyay sannadkii 2008 Qiimahaas kordhay aad ayuu uga sarreeyaa heerarka qiimaha dalagga ee kordhay adduunka. Inkasta oo qiimuhu waxoogaa hoos uga soo dhacay siduu ahaa bishii 10aad ee 2008, uu keenay faa'iidooyin, haddana weli 350-825% ayuu ka sarreeyaa sida caadiga ah. Celceliska kharashka ugu yar ee looga baahan yahay in suuqa wax lagaga soo iibsado si loo badbaado, wuxuu noqoday in ka badan labanlaab siduu ahaa sannadkii la soo dhaafay, iyadoo awoodda wax iibsiga ee saboolku ay si weyn hoos uga dhacday caadi. Dakhligu lama sinna sida uu u kordhay qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kale ee laga maarmaanka ahi.

Markii dakhligu uu awoodi waayay inuu ku filnaado qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah ee kacay, dadka saboolka ah ee reer magaalka ahi waxa khasab ku noqotay inay raadsadaan taageero dheeraad ah oo lacageed oo ah deeq siismo iyo deynba isugu jira ama qaab xawaaladeed wax ku doona, si ay u fuliyaan baahidooda cunno ee aasaasiga ah. Markii la gaaray bishii 12aad ee 20008, gargaarka lacagtu wuxuu daboolay 15-35% kharashka ugu yar ee suuqa wax lagaga soo iibsan karo. Qoysaska saboolka ahi waxay u wareegeen miraha (firida) dalka oo ka jaban kuwa dibadda la keeno, waxay iska daayeen waqtiyada qaar inay cunno cunaan , waxay cunto ka deynsadaan deriska. Tirada qoysaska reer magaalka ee saboolka ahi ee adeegsada mid ama ka badan qaababka loogu adkaysto dhibaatooyinku waxay ka kordheen 32% bishii 10aad ee 2007 iyagoo gaaray 59% bishii 10aad ee '08. Awood la'aanta in loo adkaysto dhibaatooyinka oo sii korodhay waxay keentay inay hoos u dhaceen heerarka kala duwanaanta cuntada, maaddaama 20-60% qoysaska saboolka ahi ee reer magaalka oo la sheegay inay cunaan ka yar afar nooc oo cunto ah maalintii (bishii 10aad ee 2008). Haddii xaaladdu aanay kasoo rayn, waxa gabaabsi noqon doona badi qaababka u adkaysiga dhibaatooyinka ee dadweynaha magaalooyinka. Horeba qoysaska saboolka ah ee reer magaalka waxay qabaan deyn badan, saboolnimadooduna way sii kordhaysaa, taasoo sii kordhinaysa u nuglaantooda massibooyinka.

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 3740598
Iimayka:
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

furaha xogta/tirada dadka

**Xiisadda Goobaha Xoola-dhaqatada iyo Beero-iyo-xoola-dhaqatada ee reer miyiga**

Dhibaatada haysata dadka reer miyiga ahi way ka sii liidataa, marka la eego in dad ka badan kala bar ama **680,000 oo qof ay ku jiraan Gurmad Bina-aadamnimo (GB**) oo ay u baahan yihiin wax qabadyo gurmad ah oo lagu taageerayo hab-nololeedka iyo kuwo lagu badbaadinyo nolosha**. 535,000 oo qof oo kalena waxay ku jiraan Xiisad Cunno iyo Hab-nololeed oo Aad u Xun (XCHAX)**. Tirada ugu badan ee dadweynaha reer miyiga ee ay xiisaddani haysato waxay joogaan koonfurta (66%) iyo gobollada dhexe (29%). Badi dadweynaha reer miyiga ee ay Dhibaatadani haysataa waa beero-iyo-xoola-dhaqato (49%) iyo xoola-dhaqato (40%). Xaaladda ugu xun uguna qotoda dheer ee reer miyiga ka jirtaa waxay ka taagantahay gobollada Galgaduud, Mudug, Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe, Halka 50-70% tirada guud ee dadka ay ku jiraan dhibaato, tirada dadka ka jira Gurmad Bini-aadminnimo way ka badan tahay ta tirada ku jira Xiisad Cunno Hab-nololed Aad Xun. Gobollada dhexe waxa ka taagan mid ka mid ah abaarihii ugu xumaa ee dhacay waayahan dambe, kuna xigeen xilliyo isdaba joog ah oo roob yarow ah. Saamaynta abaarta waxa sii xumeeyey arrimaha ay ka midka yihiin sicir bararka saameeyay cuntada, colaadahan sii kordhaya iyo joogitaanka 200,000 oo qof oo ku barokacay gobolkaasi. Waxa halis ku jira suurtogelidda ama jiritaanka hab-nololeedyada xoola-dhaqatada maaddaama wax soosaarka xooluhu uu aad u yaraaday, tirada xooluhuna si weyn ayay uga hoos mareeen heerarka gundhigga xoolaha sababtoo ah way dhinteen ama tiro sare ayaa la iibiyey. Heerarka nafaqa-darrada oo horeba uga sarreeyey heerarka gurmadku, waxay muujinayaan inay ka sii darayaan, iminkana waxa jira in ka badan 10,000 oo carruur ah oo ay da'doodu shan sano ka yartahay oo ay hayso nafaqa-darro xumi.

**Xiisadda Dadka Gudaha Dalka ku Barokacsan**

Colaadda sokeeye ee sii korortay waxay keenaysaa in dadka dhibaataysani ay u guuraan meelo kale oo gudaha wadanka iyo weliba inay ka gudbaan xuduudaha. Tan iyo bishii 7aad ee 2008, waxa lagu qiyaasay in tirada dadka ku barokacsani gudaha dalka ay ka korartay 870,000 oo ay gaartay 1,020,000 (UNHCR, 9kii bisha 1aad ee 2008), waxaana jira dad ka badan 275,000 oo gudaha dalka ku barokacsanaa muddo dheer. Dad barakacay fursadahii hab-nololeedka waysoo koobmeen, -helidda cuntaduna way ka sii dartay, waxaa sii xumaysay dhibaatada dhaqaalaha guud ee sii kordhaya. Hababka taa-geerada bulshada lasii culaysiyay iyo in fursadaha adeegyada bulshada ee aasaasiga ahoo soo soo koobmay. Baaritaannada nafaqadu waxay xaqiijinayaan inay sii kordheen u nuglaanshahaiyo heerarka nafaqa-darrada oo sare ugu kacay heerarka gurmadka.

**Saamaynta Waxqabadka**

- **Waxtarka Bini-aadminnimo:** Tallaabooyin lagu kordhinaya howlgalka bini-aadminnimo iyo badbaada si loo hubiyo in tirada dadka baahani ay helaan gargaar.


- **Gurmad Mucaawino Bini-aadmminimo si Loo Badbaadiyo Nolosha**
  - Waxaa loo qoondeeyay goobaha hab-nololeedyada lagu tilmaamay inay ku jiraan Gurmad Bini-aadminnimo (GB)
  - Waxaa loo qoondeeyay goobaha iyo hab-nololeedyada lagu tilmaamay inay ku jiraan xaalad nafaqo oo Halis ah ama Aad Halis u ah
  - Si loo kordhiyo muhimmadda goobaha baahidooda hore/haddaba ay ka badan yihiinwaxqabadka
  - In dardar la geliyo goobaha ay xaaladdooda kasii darayso (Galgaduud, Mudug, Shabeellada Dhexe, Hiiraan, waqooyiga Gedo)
  - Dadka gudaha dalka ku barokacsan iyo reer magaalka lagu timaamayinay ku jiraan GB isla markaana nafaqo darro heer sare ah ku jira.
  - **Taageero Hab-nololeed oo Gurmad ah**Sii mudnaan goobaha iyo hab-nololeedyada ku jira XCHAX iyo GB dardar galin si loo hanto awoodda dadkasi ay ugu fillnaadaan dhibaatooyinkan socda loona horjoogsan lahaa wadar guud oo hab-nololeedyada hantidooda oo lunta.
  - .
  - Sabool reer magaalka ma awoodaan inay isaga filnaadaan qiima kororka cuntada wxaana sii dhacaysa awoodooda wax iibsi..
  - Goobo iyo hab-nololeedyo cusub ayaa u gudbay XCHAX (Xoola-dhaqatada Golis/Guban ee waqooyiga )

**Sanduuqa 1: Tirada La Isku Daray ee Dadweynaha Miyiga, Magaalooyinka & Dadka Barkacsan ee Soomaaliya, Bisha 1aad - Bisha 6aad ee 2009**

| Gobolka | Isku Darka Tirada Dadka ee UNDP 2005 | Isku Darka Tirada Dadka Magaalooyinka UNDP 20051 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee UNDP 2005 1 | Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) | Xiisada Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX) ee Hay-sata Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah 2 | Dadka Magaa-looyinka ee ku jira Gurmad Bina-aadamnimo (GB)2 | Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee ee ku jira Gurmad Bina'aadamnimo (GB)2 | Isku Darka Dadka ku jira XCHAX iyo GB oo ah % Tirada Guud ee Dadweynaha |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Waqooyi** | | | | | | | | |
| Awdal | 305,455 | 110,942 | 194,513 | 10,000 | 20,000 | 0 | 0 | 10 |
| Woqooyi Galbeed | 700,345 | 490,432 | 209,913 | 10,000 | 5,000 | 0 | 0 | 2 |
| Togdheer | 402,295 | 123,402 | 278,893 | 55,000 | 10,000 | 20,000 | 0 | 21 |
| Sanaag | 270,367 | 56,079 | 214,288 | 20,000 | 10,000 | 5,000 | 0 | 13 |
| Sool | 150,277 | 39,134 | 111,143 | 15,000 | 0 | 5,000 | 0 | 13 |
| Bari | 367,638 | 179,633 | 202,737 | 80,000 | 0 | 25,000 | 0 | 29 |
| Nugaal | 145,341 | 54,749 | 75,860 | 25,000 | 20,000 | 0 | 0 | 31 |
| **Isku darka** | **2,341,718** | **1,054,371** | **1,287,347** | **215,000** | **65,000** | **55,000** | **0** | **14** |
| **Gobollada Dhexe** | | | | | | | | |
| Mudug | 350,099 | 94,405 | 255,694 | 30,000 | 60,000 | 0 | 80,000 | 49 |
| Galgaduud | 330,057 | 58,977 | 271,080 | 15,000 | 45,000 | 10,000 | 165,000 | 71 |
| **Isku darka** | **680,156** | **153,382** | **526,774** | **45,000** | **105,000** | **10,000** | **245,000** | 60 |
| **Koonfur** | | | | | | | | |
| Hiiraan | 329,811 | 69,113 | 260,698 | 20,000 | 65,000 | 5,000 | 135,000 | 68 |
| ShabelleDhexe | 514,901 | 95,831 | 419,070 | 30,000 | 65,000 | 0 | 165,000 | 50 |
| ShabelleHoose | 850,651 | 172,714 | 677,937 | 65,000 | 70,000 | 15,000 | 55,000 | 24 |
| Bakool | 310,627 | 61,438 | 249,189 | 25,000 | 80,000 | 0 | 45,000 | 48 |
| Baay | 620,562 | 126,813 | 493,749 | 35,000 | 5,000 | 0 | 0 | 6 |
| Gedo | 328,378 | 81,302 | 247,076 | 30,000 | 60,000 | 0 | 35,000 | 38 |
| Jubbada Dhexe | 238,877 | 54,739 | 184,138 | 25,000 | 10,000 | 0 | 0 | 15 |
| Jubbada Hoose | 385,790 | 124,682 | 261,108 | 45,000 | 10,000 | 0 | 0 | 14 |
| **Isku darka** | **3,579,597** | **786,632** | **2,792,965** | **275,000** | **365,000** | **20,000** | **435,000** | **31** |
| **Banaadir** | **901,183** | **901,183** | **-** | 30,000 | **-** | 55,000 | **-** | 9 |
| **Isku Darka Guud** | **7,502,654** | **2,895,568** | **4,607,086** | **565,000** | **535,000** | **140,000** | **680,000** | **26** |

| Tirada dadka la qiimeeyey iyo kuwa ay suurtagal tahay inay galay XCHAX & GB | Tirada saamoobay | % ee Isku darka guud ee dadweynaha | Qaybinta dadweynaha ku jira xiisad |
|---|---|---|---|
| Dadka Magaalooyinka ee La Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB | **705,000** | **9** | **22%** |
| Dadka Deggan Dhulka Miyiga ah ee la Qiimeeyey ee ku jira XCHAX & GB | **1,215,000** | **16** | **38%** |
| Qiyaasta tirada dadka cusub ee soo barokacay –oo la cusboonaysiiyey 9kii bishii 1aad | **1,020,000** | **14** | **32%** |
| Qiyaasta tirada dadkii soo barokacay | **275,000** | **4** | **9%** |
| Qiyaasta reer baadiyaha iyo reer magaalka dhibbateysan | **3,215,000** | **43** | **100%** |

## Khariidadda 1: Saadaasha Dadweynaha Miyiga, Magaalooyinka & Dadka Barokacsan Bisha 1aad - Bisha 6aad ee '09




Food Security Analysis Unit - Somalia http://www.fsausomali.org

P.O. Box 1230 Village Market, Nairobi, Kenya Email: fsauinfo@fsau.or.ke
tel: 254-20-3745734 fax: 254-20-3740598

FSAU is managed by FAO.

The boundaries and names on these maps do not imply official endorsement or acceptance by the United Nations.
The regional & District boundaries reflect those endorsed by the Government of the Republic of Somalia in 1986.

## WARBIXINTA QAYBAHA

cimilada

### CIMILADA

Guud ahaan xilliga Deyrta '08/09 waxtarka roobabka marka dhibicda, ishaysiga, muddada iyo baahsanaanta loo fiirsho mudada wuxuu ahaa mid kala duwan. balse badidood way ka hooseeyen. Roobabkii xilliga Deyrta '08/9 badi gobobollada, marka laga reebo Jubbooyinka, waxay ka billaabmeen horraantii bishii 10aad taasoo muujinaysa in roobabkii xilli roobaadka Deryta oo waqtigiisu ka gaabanyahy ku da'een waqtigii la filayey (bishii 10aad ilaa bishii 12aad). Hase yeeshee, intii uu xilliga Deyrtu socday, roobabku waxay noqdeen kuwo aan si fiican u di'in oo goobaha qaar ku kooban, waxaana ay dhammaadeen bishii 11aad oo ahayd ka hor waqigii la filayay. Waxaana ka dambeeyey xaalad roob la'aaneed oo horjoogsatay koritaanka beeraha iyo daaqa, gaar ahaan gobollada dhexe iyo qaybo ka mid ah gobollada koonfurta. Goobaha ay abaartu saamaysay ee gobollada dhexe, gaar ahaan, gobolka Galgaduud iyo qaybo ka tirsan gobolka Mudug, inkastoo sawirrada dayax-gacmeedku ay muujinayaan inay ka da'een roobab ka sarreeyaa caadiga (Khariidadda 2), haddana roobabkii Deyrta '08/09 badi way liiteen, taasoo keenaysa in xaaladaha daaqu aanay fiicnayn (Khariidadda 3). Badi barkaduhu way qallalan yihiin, taasoo keentay in la hayaamo (eeg Qaybta Xoolaha). Roobabku waxa kale oo ay ku liiteen gobolka Hiiraan, marka laga reebo degmada Beledweyne.


Waqooyi-galbeed iyo badi waqooyi-bari waxay heeleen roob ah caadi ama ku dhow (Jaantusta 1). Roobabka da'ay way ku fillaayeen inay kordhiyaan helitaanka daaqa iyo biyaha ee badi goobaha muhiimka u ah daaqa, gaar ahaan goobaha hab-nololeedka reer miyiga ee Hawd, Nugaal iyo oogada Sool. Hase yeeshee, goobaha qaar ee waqooyiga, roobabku caadi way ka hooseeyeen, taasoo keentay in xaaladaha dalga beerah, cawska iyo dhirtuba ay liitaan. Goobahaasi waxa ka mid ah badi dhulka beero-iyo-xoola-dhaqatada marka laga reebo degmeda Gabiilay, waxa kaloo ka mid ah dhulka xoola-dhaqatada ee Hawdka Hargeisa, Golis-Guban,Togdheer, Galbeed iyo Sanaag.

Koonfurta, inkastoo roobabkii hore ay wanaajiyeen dhalashada abuurkabeeraha ee qaybo ka mid ah Gedo, Baay, Bakool iyo gobollada Shabeellooyinka, kala go'ii roobabka ee horraantii bishii 11aad waxay si xun u saamaysay kobaca daaqa, koritaanka beeraha iyo herarka miro saaridda , taasoo horseeday in ay sida caadiga ahí hoos uga dhacaan mirihii la goostay, gaar ahaan gobollada Shebelloyinka iyo Juba iyo qaybo ka mid ah Gedo. (eeg qaybta miraha).


Iyadoo ay u sabab tahay roobabka oo liitay iyo muddo dheer oo roobkii la waayay ahaydna xilligii roobabku ugu xoog badnaan lahaayeen ee bishii 11aad, xaaladaha daaqsinka ee dalka intiisa badfani way ka hooseeyaan sida caadiga ah maadaama jiilaalkaa dheeraa uu ku xigo. (Khariidadda 3). Si hore loogu mariyo tayada iyo tarjumaadda macluumaadka cimilada, xogta iyo falanqaynta, FSAU iyo FEWS NET waxa ay bilaabeen inay adeegsadaan xogta Cabir-qiyaaseedka Kala- duwanaanshaha Caadiga ee Daaqsinka(CKCD) oo laga soo minguuriyay iyadoo la adeegsanayo khariidadadaha huga dhulka ee FAO ee goobaha reer miyiga iyo beeraha ee waddanka..

Middan aad khaaska ugu ah huga dhulka ee meel ku kooban iyo falanqaynta CKCD ayaa caddaatay inuu ku haboonyahay warbixinnada deegaanka iyo caddaymaha kormeerrada, guud ahaanna waxay na siisaa falanqayn aad u sugan ee xaaladda daaqsinka ku saabsan. Tusaale ahaan, goobaha xoola-dhaqatada ee degmada Ceelbarde (gobolka Bakool) sawirka dayax-gacmeedka ee caadiga ahi wuxuu muujinayaa roobabkii Derytu inay caadiga ka hooseeyeen (Khariidadda 3), meesha falanqaynta isbeddellada xogta CKCD iyo warbixinnada deegaanka waxay muujinayaa inuu jiro horumar weyn sababtuna tahay oo ah roobabka Deryta oo ka sarreeyey sida caadiga (Jaantusta 1). FSAU waxa ay sii wadi doontaa isku sixidda huga dhulledka meel ku kooban iyo CKCD ee degmada marka la falanqaynayo beeraha iyo xogta kormeerada deeganka si loohorumariyo falanqayntooda.

**Khariidadda 2: Isku Darka Roobabka (mm) 1da Bisha 10aad - 31ka Bisha 12aad ee '08**





**Khariidadda 3: Cabirka Meelaha Aan Caadiga Ahayn ee Cagaarka Dhulka, 31ka Bisha 12aad ee '08**




Waxa laga soo qaatay:: NOAA/FEWS NET/USGS


**Jaantuska 1: Xaaladda Cagaarka Dhulka ee Ceel Berde - Isbeddeladda Cabirka Cagaarka Dhulka**



## COLAADDA SOKEEYE

Xaaladda colaadda sokeeye ee Soomaaliya, gaar ahaan koonfurta iyo gobollada dhexe, waa tii ugu xumayd tan iyo intii uu billaabmay dagaalka sokeeye ee ay burburtay dawladdii sannadihii 1991-92. Tan waxa u sabab ah xaaladda siyaasadeed ee kacsan iyo kala qaybsanaanta fekradah diinta ee sii korortay. Badi colaadda socota waxa keenay halgan awoodeed oo ka dhexeeya kooxo siyaasi ah iyo kuwo diini, iyadoo colaadda inteeda kale ay ku salaysan tahay khayraadka dabiiciga ah oo ay ka dhaxaysa qabaa'il iyo jilibyo kala duwan. Guud ahaan, saamaynta colaadda sokeeye waxa ay ugu weyn tahay gobollada Shabeellooyinka iyo Galgaduud, waxaana ku xiga gobollada koonfurta iyo Mudug, iyo weliba goobaha ku hareeraysan Laascaanood ee waqooyiga (Khariidadda 4). Waxaanay colaadda si aad ah u saamaysay bulshada reer magaalka iyo dariiqyada ganacsi ee gudaha iyo soohdimaha ka gudba. Waxaa jira warbixino sheegaya inay sii korortay tirada dadka ka soo barokacay magaalada Muqdisho ee u kacya dhinaca gobollada Jubooyinka iyo Gedo si ay u gaaraan xeryaha qaxootiga ee Kiiniya.


**Khariidadda 4: Natiijooyinka Saamaynta Nabad Sugid La'aanta Soomaaliya, Bisha 1aad ee '09**




Waxa laga soo qaatay:: FSAU, 1aad 2009

Gobollada waqooyi-galbeed iyo waqooyi bari oo hore u xasilloonaa marka loo eego dalka intiisa kale, ayaa xaaladda nabadgelyadu way ka sii dartay laga billaabo bishii 10aad ee '08 sababtoo ah waxa isku mar dhacay qaraxyo oo dad naftooda hureyaal ahi ay isku qarxiyeen magaalooyinka waaweyn ee Hargeysa iyo Boosaaso. Weerarradaasi si degdeg ah ayay u saameeyeen magaalooyinka, maaddaama ay ganacsatada iyo dadka Soomaalida ah ee dibedaha joogaa bilaabeen inay maalgelintooda ka wareejiyaan Soomaaliya oo ay gaystaan dalalka Gacanka iyo Isutagga Imaaraatka Carabta. Tani waxay keentay in si muuqata ay hoos ugu dhaceen dhismayaasha iyo howlaha kale, taasoo si aad ah u saamaynaysay qoysaska saboolka ah ee reer magaalka ee ku tiirsan waxa ay ka helaan shaqo maalmeedka. Waxaa sii kordhay xiisadaha ka dhexeeysa bulshooyinka martida loo yahay iyo dadka badan ee cusub ee ka soo guuray koonfurta iyo gobollada dhexe, waxaana ay wiiqday xiriirka ka dhexeeya Miyiga-magaalada iyo kalsoonaantii ganacsi ee ka dhexeeyay waqooyiga iyo koonfurta.

**Jaantuska 2: Joogitaanka Shaqaalaha Jimciyadda Quruumaha Ka Dhaxaysa**




### *Saamaynta Tooska ah iyo Ta Dadban*

Colaadda hubaysan iyo nabadgelyo-darada sii kordhay waxa ay keentay inay kordheen xad-gudubyada lagu samaynayo xuquuqda bina-aadamka, dilka, dembiilanimada, iyo barokaca dadweynuhu. Tirada dadka gudaha dalka ku barokacsani waxay korortay 18% lixdii bilood ee u dambeeyey iyadoo ka kacday 870,000 gaartayna in ka badan 1 malyuun oo qof, taasoo ay badi u sabab tahay xaaladda kacsan ee magaalada Muqdishu. Dadka magaalaas weli ku jiraa waxay ku nool yihiin cabsi, kadib markii ciidamada Itoobiyaanku ay ka baxeen. Degmooyin badan oo ka tirsan Muqdishu waa laga qaxay sababtoo ah hore waxa loo duqeeyey si aan kala sooc lahayn ciddii wax ku noqonaysa, guryo iyo hanti ganacsi oo badanna waa la dhacay ama waa la burburiyey.

Inta badan koonfurta iyo gobollada dhexe, nabadgelyo-darrada sii korortay ayaa ku wadda inay qasayso howlaha ganacsiga iyo dhaqaalaha, khadadka gaadiidka iyo fursad-u-helidda bina-aadamnimada. Gobollada Galgaduud iyo Mudug iska-horimaad ku salaysan khayraadka dabiiciga ah ayaa soo korortay, taasoo koobaysa guurguurka xoola-dhaqatada oo ah muhiim u ah siay ugu adkaystaan dhibaatooyinka xoola-dhaqatada inta lagu jiro abaarta daba dheeraada. Dagaallo la soo cusbooneeyay oo ka dhacay bishii 12aad ee'08 magaalooyinka waaweyne ee Dhuusamareeb, Guri-ceel iyo Gelinsoor, waxay keentay in dad badani ay ka qaxaan magaalooyinka oo ay tageen dhulka miyiga ah oo horeba ay uga jirtay biyo, hoy iyo cunto la'aani sababtoo ah waxa dhulka miyiga ah ka jira **Gurmad Bina-aadaminnimo**. Dagaalku waxa kale oo uu si weyn u dhimay xiriirka taageerada bulshada ee ka dhexeeya miyiga iyo magaalooyinka.

Xaaladdan oo horeba u xumayd waxa uga sii daray xannibaada sii kordhaysa ee wax qabadyada bini-aadaminnimo ee gobolkaas tan iyo bishii 7aad sababtoo ah colaadda sokeeyo oo korortay, maaddaama cabsigelinta iyo weerarrada ku aaddan shaqaalaha samafallada ee gobolkaasi ay sii koprdhayaan, ayay si weyn u yaraysay baaxadda howlaha bini-aadaminnimo ee sannadkii 2008. Tan iyo horraantii 2008, in ka badan 183 shil nabadgelyo xumo ah oo ku wajahnaa shaqaalaha samafalka ama gargaarka ayaa lagu warbixiyay. Afar iyo soddon oo ka mid ahaa shaqaalaha samafalka ayaa la dilay; 26 shaqaalaha samafalkaayaa la qafaashay, 16-nna wali waa la haystaa. Sidaas darteed joogitaanka dalka ee shaqaalaha samafalka ee ajnabiga ah ayaa si weyn loo dhimay sannadii 2008 waxaana ay taasi keentay in goobaha qaarkood la dhimo ama dib loo dhigo gudbinta gargaarka (Jaantusta 2).

beeraha

## SOOSAARKA MIRAHA DALAGGA EE DEYRTA '08/09

***Soosaarka Dalagga***


Soosaarka Dalagga ee Deyrta '08/09 ee koonfurta Soomaaliya waxa lagu qiyaasay 54,000 MT (kaasoo 58% uu yahay haruur/masaggo, 38% gallay, 4%na bariis ), 54% ayaanuu ka hooseeyaa Celceliska Dagaalka Kadib (CDK 1995-2007). Soosaarka dalagga ee Deyrta '08/09 waa kii saddexaad ee ugu hossyey soosaarka dalagga Deyrta 14kii sano ee u dambeeyey (Sanduuqa 2 iyo Jaantusta 3). Waxa dedejiyay hoos u dhaca soosaarka dalagga arrimaha ay ka midka yihiin roobabka oo ku liitay goobah muhiimka u ah beeraha dalagga, qaababka kaabeyaasha hababka waraabinta oo aan fiicnayn, iyo dalagga xilliga caadiga ah ka baxsan iyo miraha/firidda Deyrta oo isa soo gaaray. Soosaarka dalagga ee liita waxa kale oo loo aaneeyey inay u sabab yihiin kharashka la geliyo beeraha oo sarreeyay, beero falidda ama wax beeridda oo liidatay iyo waxyeello ka timi cayayaan.

**Shaxda 2: Qiyaasta waxsoosaarka firida ee deyrta 08/09 ee koonfurta Soomalia**

| Qiyaasta waxsoosaarka firida ee deyrta 08/09 ee koonfurta Soomalia: Qiyaasta Khalad waa +/- 15% | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Gobollada | Soosaarka Deyrta '08/09 oo ah MT | | | Deyrta '08/09 08 oo ah % Deyr 2007 | Deyrta '08/09 oo ah % Celceliska Deyrihii Dagaallad Kadib (1995-2007) | Deyrta '08/09 oo ah % Celceliska Shan Sano oo Deyr (2003-2007) |
| | Gallayda | Haruurka/ meseggada | Isku darka dalagga | | | |
| Bakol | 100 | 2,700 | 2,800 | 98% | 153% | 119% |
| Bay | 500 | 21,500 | 22,000 | 56% | 70% | 60% |
| Gedo | 1,100 | 1,100 | 2,200 | 15% | 37% | 26% |
| Hiran | 1,500 | 3,000 | 4,500 | 188% | 67% | 89% |
| Juba Dhexe | 100 | 1,200 | 1,300 | 18% | 30% | 30% |
| Juba Hoose | 300 | 0 | 300 | 54% | 20% | 45% |
| Shabelle Dhexe | 4,300 | 1,200 | 5,500 | 68% | 46% | 64% |
| Shabelle Hoose | 12,300 | 300 | 12,600 | 67% | 36% | 45% |
| Wadarta guud Deyrta 2008 | 20,200 | 31,000 | 51,200 | 54% | 52% | 54% |

Badi goynta dalagga xilligan Deyrtu waxay ka soo baxday gobollada Baay iyo Shabeellooyinka (43% iyo 36% ee isku darka guud ee soosaarka dalagga, siday u kala horreeyaan). Soosaarka haruurka/maseggada ee xilliga Deyrta '08/09 ee gobolka Baay wuu fiicnaa, isagoo ahaa 71% isku darka guud ee soosaarka haruurka ee Deyrta. Hase yeeshee, soosaarka haruurka laguma guulaysan badi goobaha kale ee koonfurta Soomaaliya roobabka oo liitay dartood. Soosaarka gallayda ee Deyrta '08/09 ee koonfurta Soomaaliya, oo badi ka soo baxa hab-nololeedyada dhulka webiyadu, aad ayuu uga hooseyaa celceliska muddada dheer (1995-2007), iyo celceliska 5ta sano (2003-2007). Soosaarka gallayda ee Deryta waxa lagu qiyaasay 20,000MT, waana 50% CDK ee Deyrta, laakiin wuxuu la mid yahay soosaarkii gallayda ee Deyrtii '07/08 (22,000MT).

**Jaantuska 3: Isbeddellada Soosaarka Dalagga Deyrta (1995-2008) - Gobollada Koonfurta**




Waqooyi-galbeed, soosaarka dalagga ee Guga/Karanta '08 waxa lagu qiyaasay 17,500 MT, kaasoo ka dhigan 94% CDK. Hase yeeshee, degmada Gabiillay keligeed waxa ka soo baxay 80% isku darka guud ee soosaarka dalagga roobabka oo caadi ka sarreeye darteed, iyadoo goobaha kale ee miruhu ay ka soo baxaan ee Degmooyinka Hargeisa, Boorame iyo Oodweyne ay soo food saartay in roobabka aan lagu guulaysan, taasoo keentay in miraha dalagga aan isna lagu guulaysan.



*Gallayda Xilliga Caadiga ka Baxsan oo Wanaagsan, Ceel Wareegaw, Marka, Shabeellada Hoose, Bisha 10aad ee '08*


***Soosaarka Dalagga ee Xilliga Caadiga ah Ka Baxsan***

Roobab Xagaa ah oo aan caadi ahayn ayaa da'ay bishii 7aad iyo bishii 8aad ee '08, sidaas darteed daadadka xilliga ee ka dhacay gobollada Shabeellada Hoose iyo Jubbooyinku (Jamaame iyo Jilib) waxay keeneen fursado kalluumaysiga ah, waxa kale oo ay keeneen in goobaha qaar uu ka soo baxay laba jeer soosaarka miraha ee xilliga caadiga ah ka baxsani. FSAU iyo hay'adaha ay shaqo wadaagta yhiin waxay sameeyeen qiimayn goynta xilliga caadiga ah ka baxsan 8dii-21kii bishii 10aad ee '08, waxana ay ku qiyaastay soosaarka dalagga xilliga caadiga ah ka baxsan inuu yahay 20,150MT, kaasoo 92% uu ka soo baxay Shabeellada Hoose, 8% na uu ka soo baxay gobollada Jubbooyinka. Kani wuxuu ka dhigan yahay 39% soosaarka dalagga ee dhabta ee Deyrta '08/09. Waxa intaas dheer, daad dabiici ah iyo kuwo ay dadku mas'uul ka yihiin ayaa ka dhacay bishii 11aad ee '08 gobollada Jubbooyinka, waxaa kale oo ay keeneen fursado lagu beero dhulka biyo fariisinka leh soosaarka dalagga xilliga caadiga ah ka baxsan. Sidaas darteed, gobollada Jubbooyinku waxa la filayaa inay ka faa'iidaysan doonaan soosaar kale oo gallay ah oo xilliga caadiga ah ka baxsan laga billaabo bisha 3aad illaa horraanta bisha 4aad ee '09, kaasoo ay ka soo bixi karto 7,500MT oo dheeraad ahi.

### *Soosaarka Dalagga ee Sannadkii*

Soosaarka dalagga ee sannadkii ee koonfurta Soomaaliya (Gugii '08 iyo Deyrtii '08/09) waxa lagu qiyaasay 134,000MT, kaasoo ka dhigay 55% CDK iyo soosaarkii dalagga ee labaad ee ugu hooseeyey muddo 14 sano ah (Jaantusta 4). Haddii soosaarka bariiska ee Deryta '08/09 iyo soosaarka dalagga ee xilliga caadiga ah ka baxsan lagu doro, isku darkoodu waxa weeye qiyaastii 32,000MT, isku darka guud ee soosaarka dalagga ee sannadkii ee koonfurta waa 166,000MT. Guud ahaan, helitaanka dalagga guduhu wuu hooseeyaa, kadib laba sano oo is xigay oo uu soosaarka dalaggu caadi ka hooseeyey.


**Jaantuska 4: Isbeddellada Soosaarka Dalagga ee Sannadkii (1995 - 2008) - Gobollada Koonfurta**




### *Qiimaha Dalagga Gudaha*

Qiimaha dalagga gudaha laga soo saaraa wuxuu joogaa heerkii ugu sarreeyey dalka oo dhan (Jaantusta 5). Arrimaha isbiirsaday ee keenay waxa ku jira xilliyo is xigay oo soosaarka dalaggu uu liitay, qiimadhaca Shilinka Soomaaliya, sicir bararka aadka u sarreeya iyo baahida loo qabo dalagga gudaha oo korodhay, arrimahaas oo door weyn ka ciyaray qiimaha kordhay ee dalagga. Inkasta oo uu weli aay aad uga sarreeyaan heerarka qiimaha ee caadiga, qiimaha gallayda iyo haruurka/maseggadu hoos ayay u dhaceen tan iyo bishii 7aad, 30% iyo 55%, siday u kala horreeyaan. Bishii 12aad ee 2008, qiimaha ugu sarreeyey ee gallayda iyo haruurka waxa laga diiwaan geliyey Jubbooyinka (17,000/kg Dobley) Beledweyne, Luuq iyo Xuddur (10,000/kg). Hase yeeshee, qiimuha waxa laga yaabaa inuu kordho bilaha soo socda sababtoo ah roobabka xilliga Deyrta '08/09 si fiican umay di'in, taasoo ay la socoto in guud ahaan helitaanka dalaggu uu hooseeyo iyo in baahida loo qabo dalagga guduhu ay sii korortay.

**Jaantuska 5: Isbeddellada Qiimaha Dalagga ee Heer Gobol (ShSo)**





Bulshooyinka beeralayda ah ee gobollada Jubbooyinka iyo Shabeellooyinka, howlaha beeraha ee la xiriiraa abuuridda miraha xilliga caadiga ah ka baxsan ee dhammaadkii bisha 9aad-bisha 11aad ee '08, soosaarka caadiga ah ee Deyrta '08/09 iyo soosaarka xilliga caadiga ah ka baxsan ee la saadaaliyey dhammaadka bisha 3aad, waxay abuureen shaqo beeraha iyo fursado kale oo dalkhli ay ku helaan qoysaska saboolka ahi. Fursadaha shaqada ee gobollada Shabeellooyinka, Jubbooyinka, Hiiraan (Beledweyn), Baay iyo Bakool waxa hore u sii mariyey baahida loo qabo shaqaale sameeya jaridda dhirta aan loo baahnayn, waraabinta, ilaalinta iyo goynta iyo weliba soo rarista waxyaabaha beeraha ka soo baxa.

Iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya shaqada iyo dalaggu wuxuu kordhay 85%-130% tan iyo bishii 7aad ee '08 gobollada koonfurta. Iswaydaarsiga ganacsiga ee ugu sarreeya ee ka dhexeeya dalagga iyo shaqada waxa laga diiwaan geliyey gobollada Jubooyinka iyo (Beledweyne) Hiiraan (11kg/heerka mushaharada shaqada ee maalintii iyo 10kg/heerka mushaharada shaqada ee maalintii, siday u kala horreeyaan), kaasoo aad uga sarreeya ama ku dhow celceliska Shan sano. Heerarka mushaharada shaqada ee maalintii ee gobolladaasi waxay kordheen bishii 12aad, iyadoo qiimaha dalagga guduhu uu muujiyey isbeddello ah inuu hoos u dhacayo lixdii bilood ee u dambeeyey ee 2008 (bishii 12aad ee '08 gallaydo waxay joogtaa 11,000 ShSo, haruurka ama maseggaduna wuxuu ahaa 9,500 ShSo). Inkasta oo iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya shaqada iyo dalaggu uu aad u ficnaaday lixdii bilood ee u dambeeyey 2008, haddana weli wuu ka hooseeyaa ceceliska muddada dheer sicir barbarka sii socda dartiis.

### *Isu Dheellitirnaanta Miraha*

Isu Dheellitirnaanta Mirha ee Sannadkii ee bishii 6aad ee 2008- bishii 5aad ee 2009 oo la soo saaray bishii 8aad waxa lagu cusboonaysiiyey qiyaasaha soosaarka dalagga Deyrta '08/09 ee hadda, qiyaasaha goynta miraha ee Guga/Karanta ee waqooyi-galbeed, alaabooyinka sida joogtda dibedda ganacsi ahaan looga keenay (bishii 6aad – bishii 12aad ee 2008), iyo weliba warka la soo cusboonaysiiyey ee qaybinta cuntada gargaarka ah, ta keydka ah iyo ta soo socota. Guud ahaan, isu dheelitirka miraha ee la qiyaasay wuxuu muujinayaa in haddii aan la helin cunto gargaar ah, uu si weyn u dhinmi doono miraha qiyaas u dhaxaysa 75,000 iyo 170,000MT sannadkan. Faraqan ka dhinmi doona cuntada ee la qiyaasay waxa u sabab ah saamaynta arrimaha isbiirsaday ee soosaarka dalagga gudaha ee caadi ka hooseeya iyo heerarka dalagga dibedda laga keeno oo hooseeya.

**Jaantuska 6: Isbeddellada Dalagga Ganacsiga Dibedda Looga Keeno (2005 - 2008)**




Dalagga ganacsiga dibedda looga keenaa wuxuu muujinayaa inuu isbedbeddelayay 12kiibilood ee u dambeeyey. Isku darka guud ee dalagga dibedda laga keenay 2008 wuxuu ahaa 328,950MT, kaasoo 23% ka hooseeya celceliska saddex sano (2005-2007). Tan badi waxa u sabab ah qiimadhaca Shilinka Soomaaliya iyo kharashka soo dejinta badeecadaha ee kordhay budhcadnimada badda oo keentay in kharashka maraakiibta iyo cashuurtu ay korodho dartood (Jaantusta 6).


## XOOLAHA

### *daaqa iyo xaaldda biyaha*

Xaaladaha daaqu way kala duwan yihiin, iyadoo lala xiriirinayo kala duwanaanshaha roobabkii xilliga Deyrta '08/09, sida ka muuqata Khariidadda 5. Xaaladaha daaqa ee goobaha ay abaartu aafeysay ee gobollada Galgaduud, Mudug iyo Hiiraan iyo goobaha ay roobabku ku yaryihiin ee hab-nololeedka Hawd ee gobollada Sool, Nugaal iyo Mudug iyo hab-nololeedka Cad-duun ee Mudug, way ka sii dareen kadib xilli roobaad kale oo ay roobabku liiteen.

waxa iyana jira Goobo kale oo aay si xoogan u saameysa roob yarowga xilliga Deyrta '08/09 kuwaas oo ay ku jiraan gobollada Shabeellada Dhexe, Jubbada Dhexe, goobo ka tirsan Jubbada Hoose, Degmada Ceel Waaq ee gobolka Gedo, galbeedka oogada Sool ee Sanaag, Hawdka Sare ee Togdheer, iyo buuraha Golis/Guban ee waqooyi-galbeed. Badi qoysaska xoola-dhaqatada ee goobahaasi waxay horeba u bilaabeen inay u guuraan gobollada deriska ah iyo weliba gobolka Soomaalida ee Itoobiya. Roobabkii liitay ee da'ay xilli-yadii Gugii '07, Deyrtii '07/08, Guga '08, iyo Derytii hadd la soo dhaafay ee '08/09 waxay keeneen inay qallalaan dhammaan berkadaha, waraha, iyo in badan oo ceelal gacmeedyada ku yaalla goobaha xoola-dhaqatadu. Dhulka daaqa ee Golis ee gobollada Galbeed, Awdal, koonfurta Hawdka Togdheer, Bari, bariga Nugaal, Baay, Bakool iyo goobo xaddidan kana tirsan gobollada Jubbooyinka iyo Gedo waxay ka faa'iidaysteen roobabkii Deyrta '08/09 oo ahaa caadi ama ku dhowaa caadi, Iyo weliba roobabkii Xagaaga ee buuraha Golis ee gobollada waqooyiga, oo hore u mariyey biyaha balliyada iyo ceelasha, oo keenayna inay hagaagto xaaladda daaqa

**Khariidadda 5: Xaaladaha Seeraha iyo Guuritaanka Xoolaha ee Soomaaliya, Bisha 1aad ee 2009**




Waxa laga soo qaatay:: FSAU, 1aad 2009

### *Guuritaanka Xoolaha*

Weli waxa ka socda qaybo badan oo dalka ah guuritaan xoolaha ah oo aan caadi ahayn, inkastoo uu hoos u dhacay marka la barbar dhigo lixdii bilood ee u dambeeyey (Kharii-dadda 5). Isbeddellada guuritaanka caadiga ah ayaa lagu arkay gobollada Galbeed, Awdal, Sool, Bari, qaybo ka tirsan gobollada Jubbooyinka, Baay, Bakool iyo Shabeellada Hoose. Gobolka Galgaduud, xoolaha qaar ayaa u guuray gobolka Soomaalida ee Itoobiya, waxa kale oo ay u guureen gobollada Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe. Hase yeeshee, sababtoo ah roobab ku koobnaa goobaha qaar oo xoogaa hore u mariyey daaqa iyo biyaha ceelasha dartood, xoolaha hab-nololeedyada Cadduun iyo xeebtu kama ay guurin gobolkaas (goobaha Cadduun ee u dhaxeeye magaalooyinka Ceel-buur iyo Dhuusa-mareeb). Xoolaha galbeedka Sool iyo hab-nololeedka Golis/Guban ee gobolka Sanaag waxay u guureen bartamaha dooxada Nugaal, Hawdka hoose ee Togdheer iyo gobolka Bari, iyadoo xoolaha gobolka Shabeellada Dhexe iyo degmada Wanlaweyn ee gobolka Shabeellada Hoose ay u guureen qaybo ka tirsan koonfurta Shabeellada Hoose. Xoolaha hab-nololeedka Daawa waxay u guureen dhulka webiyada ee gobolka Gedo, xoola-dhaqatadaha hab nololeedka Koonfurta Guduhuna ay u guureen Jubbooyinka. Gobollada Jubbooyinka, lo'du waxay u guurtay dhulka webiyada ee Jubbooyinka iyo kaynta Hola ee degmada Badhaadhe.


### *Xaaladdaha Jidhka iyo Koritaanka TiradaXoolaha*

Muuqaalka xooluhu waa uu liitaa sababtoo ah xaaladaha daaqa iyo biyaha ee guud ahaan ka sii daraya gobollada ay abaartu saamaysay ee Galgaduud, Mudug, Hiiraan iyo Shabeellada Dhexe iyo goobaha ay roobabku ku yar yihiin ee waqooyiga Mudug, koonfurta Nugal, iyo galbeedka Sanaag. Waxa sidan ka duwan, xaaladaha jidhka xoolaha oo ah caadi ama wanaagsan gobollada Awdal, Galbeed, Bari, Shabeellooyinka, Baay, Gedo iyo Jubbooyinka xaaladaha daaqa iyo biyaha oo guud ahaan wanaagsanaaday dartood. Heerarka dhalmada geela, lo'da iyo ariga ee xilliga Deyrta '08/09 way hooseeyaan ama maba jiraan gobollada ay abaartu saamaysay ee Galgaduud, Mudug, Hiiraan, Bakool iyo Shabeellada Dhexe, laakiin heerarka dhalmada xooluhu way hoosaysay ama waxay ahayd dhexdhexaad goobaha ay roobabku ku yar yihiin ee Mudug, Sool iyo Sanaag. Waxa sidan ka duwan gobollada Jubbooyinka, Baay iyo Shabeellada Hoose oo heerarka dhalmada ee geela, lo'da iyo arigu ay yihiin dhexdhexaad illaa kuwo sarreeya ayadoo uurqaadkuna uu yahay heer dhexdhexaad ah. Gobollada Bari, Sool, Togdheer, Awdal iyo Galbeed, geelu ma dhalin, laakiin heerarkooda rimiddu waa heerar dhexdhexaad illaa kuwo sarreeya. Hase yeeshee, heerarka dhalmada ee arigu waxaa dhexdhexaad, rimiddooduna waa dhexdhexaad ama way sarraysaa.

Qaabka isbeddellada tirada xoolaha xoola dhaqatada ee FSAU xilliga Deyrta '08/09 wuxuu muujinayaa inay hoos u dhacayso tirada xooluhu marka loo eego dhammaadkii xilligii Guga ee '08 (bishii 6aad ee '08). Tusaale ahaan, goobaha ay abaartu saamaysay ee Galgadud, Mudug, Hiiraan, Shabeellada Dhexe iyo Bakool, waxaa jira isbeddello muujinaya in tirada xooluhu ay hoos u dhacday marka loo eego intii ay ahayd bishii 6aad ee '08, (tusaale ahaan tirada geelu waxay hoos u dhacday 20-35%; tirada lo'du waxay hoos u dhacday 18-20%; tirada adhiguna waxay hoos u dhacday 22%-31%), tiradan xoolaha ee hoos u dhacday waxa loo aaneeyey inay u sabab yihiin heerarka dhimashada xoolaha oo sarreysa, iyo weliba tirada badan ee xoolaha ah ee loo iibiyey si loogu bixiyo kharashka biya-dhaamiska iyo qiimaha cuntada ee gaaray heerkii ugu sarreyey. Tirada xoolaha ee goobahaasi aad ayay uga hooseeyaan heerarka caadiga ah. Lo'da ayaa si aad u xun u saamaysay abaartu, waxaana tirada lo'du ay hoos u dhacday 47-53%, marka loo eego heerarkii caadiga ahaa. Sidoo kale, goobaha ay roobabku ku yar yihiin ee hab-nololeedyada Hawd iyo Cadduun ee Mudug, xoola-dhaqatada Golis/Guban ee waqooyi-galbeed, Sool-ta Sanaag iyo hab-nololeedka xoola-dhaqatada ee Daawo ee Gedo iyana waxa ka muuqata isbeddello muujinaya in tirada xooluhu ay hoos u dhacayso, inkasta oo ay ku dhow yihiin heerarkii caadiga u ahaa. Waxa sidan

ka reebban taagga Sool, oo tirada geelu aysan weli gaarin heerarkii caadiga u ahaan tan iyo 2004; hase yeeshee calaamaduhu waxay muujinayaan in isbeddeladani ay ka tarjumayaan isbeddellada tirada xoolaha ee xoola-dhaqatada caadiga u ahi. Marka laga reebo taagga Sool, tirada geelo way ka sarraysaa heerarka caadiga u ah dhammaan hab-nololeedyada xoola-dhaqatada ee badi gobollada waqooyi-galbeed iyo waqooyi-bari, iyo goobo hab-nololeedka xoola-dhaqatada Koonfurta Gudaha ee gobollada Jubbooyinka iyo Gedo. Guud ahaan, ma jiraan cudurro waaweyn oo xoolaha gala oo dillaacay. Hase yeeshee, waxa jira dhacdooyin la xiriira cudurka kudka oo laga soo sheegay gobollada ay abaartu saamaysay. Cudurrada caadiga ah (sida cudurrada ka dhasha shilinta iyo cayayaanka jidhka xoolaha ku nool) ayaa si baahansan looga soo sheegay badi gobollada.


**Jaantuska 7: Isbeddellada Qiimaha Lo'da Dibaaxa ah ee Heer Gobol (ShSo/ShSl)**




***Qiimaha Xoolaha iyo Awoodda Wax Iibsiga ee Xoola-dhaqatada***

Guud ahaan, qiimaha dhammaan noocyada xoolaha ee Soomaaliya oo dhami si tartiib ah ayuu u kordhayay tan iyo bishii 1aad ee '07 waxaana uu ka sarreeya celceliska 5 sano, taasi badi waxa keentay jawaab celin ku aaddan culayska guud ee ka imanya sicir bararka, qiimadhaca Shilinka Soomaaliya (ShSo), iyo baahida weyn ee loo qabay xoolaha xilliyadii Xajka iyo Ramadaanta dartood (Jaantusta 7 iyo 8). Qiimaha xooluhu xoogaa ayuu hoos u dhacay goobaha qaar lixdii bilood ee u dambeeyey. Qiimaha xoolaha waxa la filayaa inuu sarreyo isagoo ka jawaab celinaya qiimedhaca Shilinka Soomaaliya, isbeddellada guud ee la xiriira sicir bararka iyo weliba baahida korortay ee ka timid suuqyada gudaha iyo dibedda. Hase yeeshee goobaha ay abaartu saamaysay iyo kuwa ay roobabku ku yar yihiin ee gobollada Galgaduud, Mudug, Hiiraan, iyo Shabeellada Dhexe kama faa'iidaysan doonaan qiimahaas kordhay sababtoo ah tirada xoolaha iibgalka ahi way kooban yihiin goobahaasi.Qiimaha riyaha dhoofintu xoogaa ayuu hoos u dhacay gobollada dhexe, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed, marka la barbar dhigo siduu ahaa bishii 11aad ee '08; hase yeeshee qiimuhu weli wuxuu joooga heerkii ugu sarreeyey weligiis, taasoo loo aaneeyey inay badi u sabab yihiin qiimedhaca ShSo iyo baahida ka imanaysa suuqyada ee korortay. Tusaale ahaan, celceliska qiimaha iibka lo'da ayaa hoos u dhacay Dec.08 marka loo eego July 08 ee Jiidda Mesagada ku hodanka ah, gobollada woqooyin bari iyo Jubbooyinka waxaana qiimuhu dhacay 15%, 2% iyo 29% ee sida ay u kala horreeyaan. Hase yeeshee, celceliska qiimaha dhoofinta riyaha ee gobollada Woqooyi Bari, Woqooyi Galbeed iyo Dhexe ayaa sarreeya 21%, 10% iyo 51% marka loo barbar dhigo bishii 7-aad 08. Sidaasi si la mid ah, dhammaan qiimaha xoolaha ee xilligaan ayaa aad uga sarreeya marka loo eego celceliska qiimaha shantii sano ee la soo dhaafay.

**Jaantuska 8: Isbeddellada Qiimaha Rida Daabaxa ah ee Heer Gobol**





Qiimaha xoolaha ee sida weyn u kordhay iyo qiimaha dalagga ee sida weyn hoos ugu dhacay dartood, awoodda wax iibsiga ee xoola-dhaqatadu oo lagu qiyaasayo iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya xoolaha iyo dalaggu, si weyn ayuu u kordhay dhammaan gobollada, laakiin weli wuu ka hooseeyaa heerarka iswaydaarisga (Jaantusta 9). Celceliska iswaydaarsiga ganacsiga ee rida dhoofinta iyo bariiska ee gobollada dhexe, waqooyi-galbeed iyo waqooyi-bari 100%, 28% iyo 74%, ayay sarreeyaan marka loo eego siday ahaayeen bishii 7aad ee '08, sida ay u kala horreeyaan. Hase yeeshee, iswaydaarsiga ganacsigu 11%, 19% iyo 17% ayuu ka hooseeyaa siduu ahaa isla bashaas ee sannadkii ka hor, siday u kala horreeyaan. Tan waxa u sabab ah sida weyn uu u kordhay qiimaha bariiska dibedda laga keenaa bishii 12aad ee '08 gobollada dhexe, waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed (138%, 151% iyo 49%, marka la barbar dhigo siduu ahaa isla muddadaas ee sannad ka hor, siday u kala horreeyaan), sidoo kale waxa aad u kordhay qiimaha dalagga gudaha ee gobollada dhexe iyo waqooyi-bari (359% iyo 340%), marka loo eego celceliska bisha 12aad ee 5 sano.

***Dhoofinta Xoolaha***

Koonfurta, ganacsiga lo'da ee isaga tallaaba soohdinta u dhaxaysa Soomaaliya iyo Kiiniya wuxuu ku waday inuu socday, baahida weyn ee ka imanaysa Kiiniya darteed. Sidoo kale, gobollada dhexe iyo waqooyiga, guud ahaan tirada dhammaan noocyada xoolaha ee dibedda loo dhoofiyey waxay u dhigmayeen celceliska 5 sano ee heerarka dhoofinta. Sidoo kale, baahida korortay ee la xiriirta Xajka iyo Ramadaanta iyo qiimaha xoolaha ee kordhay waxay keeneen in dakhliga xoola-dhaqatadu uu kordhay. Hase yeeshee, qoysaska gobollada ay abaartu saamaysay ee Galgaduud iyo Mudug si fiican ugamay faa'iidaysan riyaha leh tayada dhoofinta ee ay haystaan oo koobnaa dartood. Xoolaha laga dhoofiyey bishii 1aad ilaa bishii 12aad ee '08 dekedaha Berbera iyo Boosaaso waxay gaareen 2,668,545 oo neef, kuwaas oo 92% ay ahaayeen ari. Tiradani 1% keliya ayay ka hoosaysaa celceliska tiradii la dhoofiyey bishii 1aad-bishii 12aad ee sannadihii '03-07 (2,699,379 oo neef). Shanta sayladood ee dalka ee hilibka qalan laga dhoofiyaa dib ayay howlahoodii u billaabeen. Salaydda hilibka lagu qalo ee Beledweyne waxay ahayd tii ugu dambaysay ee howlaheeda billowday, iyadoo howsha billowday bartamihii bishii 11aad ee '08. Sannadkii 2008, isku darka neefka qalan ee hilibkood loo dhoofiyey dalalka gacanku waxay ahaayeen 492,497. Salaydaha Burco iyo Gaalkacayo waxa laga dhoofiyay isku dar guud oo dhan 151,471 iyo 77,992 oo neef hilibkood, siday u kala horreyaan, kaasoo 115% iyo 147% ka sarreeya tiradii dibedda loo dhoofiyey sannadkii 2007 (70,318 iyo 31,639 oo neef hilibkood), sayladaha Muqdisho iyo Beledweynena waxa laga dhoofiyey 252,979 iyo 10,055 oo neef hilibkood, siday u kala horreeyaan.

**Jaantuska 9: Isbeddellada Heerka Gobol ee Iswaydaarsiga Ganacsiga, Dalag Lagu Beddelanyo Rida Dibaaxa ah**



## SUUQYADA

### *Qiimadhaca Shilinka Soomaaliya*

Shilinka Soomaaliya (ShSo) si weyn ayuu u qiimadhacay taniyo horraantii sannadkii 2007, waxana uu qiimadhacay 57% 2007, sannadkii 2008na wuxuu sii qiimadhacay 45% (Jaantusta 10). Qiimadhacan weyn waxa badi loo aaneeyey inay u sabab tahay si aan xakamayn lahayn oo badan oo loo daabacay lacagta warqadda ah billowgii 2007, taasoo ay wehlisay lumidda kalsoonidii lagu qabay lacagta guduhu. Hase yeeshee, tan iyo bishii 10aad ee '08 lacataasi waxay billowday inay dib u qiimayeelato. Baaritaan Lacag Sarrifeyaasha Soomaaliya ay ku sameeyeen FSAU/ FEWSNET, qiimayntii Deyrta '08/09 kadib, waxa lagu go'aamiyey in qiimayeelashada Shilinka Soomaaliya ay u sabab yihiin tirada Doolarka Maraykanka ee wareegaya oo korortay, iibka xoolaha dhoofinta iyo budhcad-nimada badda oo ay weheliso joojinta daabacaadda lacagtu dartood. Inkasta oo Shilinka Soomaaliya uu qiimihiisu fiicnaaday dhowrkii bilood ee u dambeeye, haddana wuxuu weli joogaa heerka qiimadhicii ugu xumaa ee weligiis la diiwaangeliyey. Waxa sidan ka duwan, Shilinka Soomaalilaad oo ku wada inuu xasilloon yahay, welina wuxuu joogaa isla heerkii sarrifka ee uu joogay sannadkii 2005.

### *Qiimaha Badeecadda Ganacsiga Dibedda Looga Keeno*

Qiimaha badeecadda dibedda laga keenaa wuxuu ku wadaa inuu joogo heerarkii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey, xitaa kadib markii uu aad hoos ugu dhacay tan iyo bishii 10aad ee '08 (Jaantusta 11). Badi sicir bararka sare waxa keenay qiimadhaca ShSo, oo ka dhigay in dibed ka soo iibsiga ganacsigu uu noqdo mid kharash badan. Sicir bararku qayb ahaan waxa keenay qiimaha adduunka ee sii kordhaya. Tan iyo sannadkii 2007, qiimaha bariiska ee ka kordhay Soomaaliya guud ahaan wuxuu la socday isbeddellada caalamiga ah, hase yeeshee qiimaha ka kordhay Soomaaliya wuu ka badan yahay ka caalamiga, faraqa labada qiime u dhexeeyaana si weyn ayaanu u sii kordhay lixdii bilood ee u dambeeyey (Jaantusta 12). Marka la barbar dhigo qiimaha caalamiga ah ee bariiska qiimaha bariiska ay ganacsatadu ku iibiyaan Muqdisho, celceliska faraqa labada qiime u dhexeeyaa waa .26 kg/Doolarkii bishii 1aad ee '07 ilaa bishii 3aad ee '08. Kani wuu kordhay oo wuxuu noqday celceliska faraqa labada qiime u dhexeeyaa .61 kg/Doolarkii bishii 6aad ilaa bishii 12aad ee '08.


Arrimaha xagga dhaqaalaha ee isbiirsaday ee ShSo ee taag darreeyey, kharashka dibad ka keenidda iyo markab soo saaridda ee kordhay, budhcad-nimada badda darteed, saadka dalagga gudaha oo caadi ka hooseeya iyo guud ahaan saadka oo uu dhinmay waxay ku wadaan in qiimaha cuntada ee Soomaaliya uu sarreeyo iyo inuu sii kordhayo faraqa u dhexeeya qiimaha cuntada ee Soomaaliya iyo qiimaha cuntada ee adduunku.

### *Kharashka Nolosha oo Kordhay*


Sicir bararka sare wuuu keenay inay ku adkaatay qoysaska, gaar ahaan kuwa saboolka ahi, inay daboolaan baahidooda lagama maarmaanka u ah badbaadada noloshooda ee cuntada iyo waxyaabaha kale ee aasaasiga ah. Si ay u qiyaasto una kormeerto sicir bararku sida uu u saameeyo dadka saboolka ah ee magaalooyinka, FSAU waxay soo saartay qaabka kharashka ugu yar ee suuqa wax lagaga soo iibsan karo (MEB) iyo qaabka tixraaca qiimaha macmiisha (CPI).

Dadka saboolka ah ee magaalooyinka qaabka CPI wuxuu muujinayaa inuu si weyn u kordhay kharashka ugu yar ee suuqa wax lagaga soo iibsan karaa (CMB) 18kii bilood ee la soo dhaafay (Jaantusta 13). Markii la gaaray bishii 3aad ee '08 celceliska CMB, ama CPI, wuxuu ahaa 160-201% ee kharashkii bishii 3aad ee '07, markii la gaaray bishii 10aad ee '08 wuxuu ahaa 233-338%. Celceliska CMB ee labanlaabmay ama saddexlaabmay waxa badi loo aaneeyey inuu keenay qiimaha haruurka/maseggada ee kordhay, maaddaama dalaggu uu ka dhigan yahay qaybta ugu weyn (50-60%) ee kharashka ugu yar ee suuqa ay wax kaga soo iibsan karaan dadka saboolka ah ee magaalooyinku. Heerarka ugu sarreeya ee CPI, 338% iyo 280%, waxay ka dhaceen gobollada dhexe iyo koonfurta.


**Jaantuska 10: Isbeddelladaha Heerarka Sarrifka Lacagta – SHSO iyo SHSL oo lagu beddelanyo Doolarka Maraykanka**




**Jaantusta 11: Shabeellooyinka Isbeddellada Qiimaha Badeecadda Dibedda laga Keeno oo loo Eegayo Heerka Sarrifka Lacagta**





**Jaantuska 12: Qiimaha Bariisa ee Muqdisho oo Loo Eegayo Qiimaha Caalamiga ah Bishii 1aad ee '07 ilaa Bishii 12aad ee '08**




Source: FAO/WFP, FEWS NET and FSAU

**Jaantuska 13: Isbeddelladaha Heerka Gobol ee CPI**





---

1 Eeg Warbixinta Taxanaha Farsamada ee FSAU: Falanqaynta Deyrta '08/09 Kadib, 28ka Bisha 2aad ee 2009 si aad u hesho sifayn buuxda oo ku saabsan MEB iyo CPI.

## GUUDMAR AH XAALADDA NAFAQAADA


Falanqayn isku jirta oo ku saabsan macluumadka nafaqada ee la soo uruuriyey bishii 7aad ilaa bishii 12aad ee 2008 waxay muujinaysaa xaalad nafaqo oo kala duwani inay ka jirto dalka, iyadoo qaybo badani ay ku wadaan inay sheegayaan heerar nafaqa-darrada guud ah oo gurmad ah (Khariidadda 6). Arrimaha isbiirsaday ee ay ka midka yihiin xaaladda hubinta cuntada oo ka sii daraysa qaybo ka tirsan dalka, barkaca ay keentay nabadgelyo darrada oo sii socda, dillaaca cudurrada oo aan la xakamayn iyo la'aanta adeegyada lagama maarmaanka ah, ayaa kordhiyey nuglaanta xagga nafaqada ee dadka, isla markaana yareeyay u adkaysigooda arrimaha naxdinta la ee sii socda.

**Khariidadda 6: Xaaladda Nafaqada Soomaaliya oo La Qiyaasay, Bisha 1aad ee '09**




17 Qiimaynood oo nafaqada ah oo matala dadweynaha ayay FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan sameeyeen bishii 10aad ilaa bishii 12aad ee 2008 (Jaantusta 14). Qiimaynahaas, siddeed ka mid ahi waxay sheegeen in nafaqa-darrada guud (GAM) ay ka hoosayso heerararka gurmadka ee 15%, saddex qiimaynood waxay sheegeen heerar u dhexeeya 15-19.9%, lixda haydhayna waxay sheegeen heerar ka badan 20%. Heerarka nafaqa-darrada aadka u xun (SAM) waxay joogeen heer aad u sarreeya oo aan la aqbali karin, iyadoo ay lix qiimaynood sheegeen inuu ka sarreeyo 4%, lix qiimaynood oo kalena waxay sheegeen inuu u dhexeeyo 2-4%, inta hadhayna waxay sheegeen inuu ka hooseeyo 2%. Hase yeeshee, dhammaan qiimaynaha heerarka dhimashada ee guud iyo heerarka dhimashada ee carruurta ay da'adoodu ka yartahay shan sano waxay ku wadeen inay ka hooseeyeen heerarka gurmadka ee 2 iyo 4 geeriyood 10,000 ee qofba maalintii, laakiin heerar sare oo dhimasho ah ayaa laga soo sheegay qiimaynaha Golis/Guban ee gobollada waqooyi-galbeed, dadka ku barkacsan gudaha ee jooga Boosaaso, hab-nololeedka Hawd, dhulka webiyada ee Shabeellooyinka iyo gobollada Jubbooyinka.

**Jaantuska 14: Xaaladda Nafaqada Soomaaliya oo La Qiyaasay, Bisha 1aad ee '09**




Dhulka miyiga ah walaaca ugu badan ee ku calaamdsan midab cas khariidaddu waxa laga qabaa hab-nololeedka Golis/ Guban ee gobollada waqooyi-galbeed, hab-nololeedka Hawd ee gobollada dhexe ee soohdinta la leh Itoobiya, gobolka Bakool iyo gobolka Gedo. Dadka gudaha dalka ku barakacsan, xaaladooda nafaqo walaac weyn ayaa laga qabaa, iyadoo heerarka ugu sarreeya ee nafaqa-darrada guud iyo nafaqa-darro aad u xun laga soo sheegay dadka ku barakacsan Bosaaso bishii 12aad ee 2008. Dadka kale ee muddada dheer ku barakacsana magaalooyinka Gaalkacayo, Garoowe, Hargeisa, Berbera iyo Burco iyana waxa soo food saaray heer sare oo nafaqa-darro joogto ah taasoo aanay shaki lahayn inay uga sii dartay xiisadda qiimaha cuntada ee ka taagan magaalooyinku marka la eego sida ay ugu tiirsanyihiin cunto iibsiga si ay fursad ugu helaan cunto.

Iyadoo ku salaysan falanqaynta isku jirta, natiijooyinka qiimaynta nafaqada iyo isticmaalka heerarka dhexe, qiyaastii 200,000 oo ah carruur ay da'doodu ka yartahay 5 sano oo loo malaynayo ayay haysaa nafaqa-darro guud, kuwaas oo qiyaastii 60,000 ay hayso nafaqa-darro aad u xumi, haddii aanay helin daaweyn ku habboon halis sii kordhaysa waxay ugu jiraan inay dhintaan. Tan macnaheedu waxa weeye in Soomaaliya, 6dii carruur ahba hal ay hayso nafaqa-darro guud, 20kii caruur ahna hal ay hayso nafaqa-darro aad u xumi. Tirooyinkani waxay la mid yihiin kuwii Gugii 08, laakiin way ka sarreeyaan kuwii Deyrtii '07/08. Saddexdii meeloodba hal carruurtaasi waxay joogaan gobollada Shabeellooyinka dadweynaha goobahaas jooga oo tiro badan darteed, waxa ku xiga gobollada Galgaduud, Mudug iyo Baay. Walaaca ugu weyn waxa laga qabaa xaaladda nafaqada oo ka sii daraysa gobollada Galgaduud iyo Mudug, oo ay jiraan qiyaastii 10,000 oo carruur ah oo u baahan daryeel quudin iyo nafaqayn ah, hase yeeshee nabadgelaya daraida sii socota ayaa ka hortaagan inay fursad u helaan daryeel habboon. Natiijooyinka ugu muhiimsan oo la soo koobay waxa lagu soo bandhigay qaybaha gobollada ee hoos ku xusan, iyadoo falanqayn heer gobol iyo heer hab-nololeed ah lagu bixiyey Warbixinta Taxanaha Farsamada ee FSAU: Cusboonaysiinta Warbixinta Naqada, Bisha 10aad-Bisha 12aad ee *'08.*

2 Natiijooyinka Baaritaanka nafaqada waxa war bixintooda la diyaariyey iyadoo la isticmaalayo qiimaha NCHS 1977 marka la qiyaasayay GAM iyo SAM.

nafaqada


# FALANQAYNTA HUBINTA CUNTADA EE ISKU JIRTA

## MAGAALOOYINKA

Markii ugu horraysay muddo ka badan 15 sano, ayay dad badan oo ka tirsan dadka xiisadda ku jira ee jooga Soomaaliya ay yihiin dadka Saboolka ah ee magaalooyinka, oo ku wada inay halgan ku jiraan iyo inay u adkaystaan sicir bararka qiimaha cuntada. Iyadoo aanu wax weyni iska beddelin xaaladda hubinta cuntada ee Soomaaliya tan iyo Gugii '08, qiyaastii 25% dadweynaha magaalooyinka ee Soomaaliya ama 705,000 oo qof ayaa weli u baahan gargaar bina-aadamnimo (Khariidadda 8). Isku darkan guud, 565,000 oo qof oo ka mid ahi waxay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX),** waxana ay u baahan yihiin taageero hab-nololeedka ah oo gurmad ah, 140,000 oo kalena waxay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo (GB),** waxaana ay u baahan yihiin gargaar hab-nololeedka ah iyo mid badbaadinta nolosha ah oo gurmad ah. Waxa intaas dheer, tirada dadka gudaha dalka ku barkacsani aad ayay u kortay colaaddii dhowaan dhacday darteed, iyadoo ka korortay 870,000 oo ay ahayd Gugii '08 gaadhayna 1,020,000 oo qof, dadkaas oo uu si xun u saameeyey sicir bararka sare.

Dadka saboolka ah ee magaalooyinku waxay ku wadaan inay halgan ugu jiraan daboolidda baahidooda lagama maarmaanka ah ee cuntada iyo waxyaabaha kale ee loo baahanyahay qiimaha cuntada oo gaaray halkii ugu sarraysay ee la diiwaan geliyey dartiis. Sannadkii 2007 ilaa 2008, qiimaha bariiska dibedda laga keeno iyo dalagga gudhu wuxuu kordhay 230% ilaa 350%, kaasoo aad uga badan heerarka qiimaha ku kordhay dalagga ee adduunka. Inkasta oo qiimuhu uu in yar hoos u dhacay laga billaabo bishii 10aad ee '08, oo ay taasi keentay xoogaa faa'iidooyin ah, haddana weli 450-780% ayuu ka sarreeyaa celceliska muddada dheer ('97-'05) sidaas darteedna weli wuxuu joogaa heerkii ugu sarreeyey ee la diiwaangeliyey. Celceliska kharasha ugu yar ee suuqa ay wax kaga soo iibsan karaan saboolka magaalooyinku, ama tixraaca qiimaha macmiisu wuu labanlaabmay taniyo bishii 3aad ee '07, iyadoo qiimakorodhka ugu badani uu ka dhacay gobollada koonfurta iyo kuwa dhexe, waxana uu kordhay 280% (bishii 6aad ee '08) iyo 338% (bishii 10aad ee '08).


**Khariidadda 7: Saadaasha Dadweynaha Magaalooyinka Bisha 1aad-Bisha 6aad ee '09**




Source: FSAU, Jan. 2009

Awoodda wax iibsiga ee qoysaska saboolka ah ee magaalooyinku hoos ayay u dhacday tan iyo sannadkii 2007, maaddaama heerarka dakhligu aanay la sinnayn qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah ee kordhay. Saboolka magaalooyinku waxay ka helaan dakhligooda ugu badan shaqada xirfad laawe yaasha. Afar jeer oo ay FSAU ku samaysay qiimayn magaalooyinka sannadkii la soo dhaafay oo ay weheliso falanqayn suuqyada ahi, waxay muujinayaan in sicir bararka qiimaha badeecaddu uu saamayn sicir bararka la xiriira ku yeeshay dakhliga, oo ay mushahaarooyinku kordheen (Jaantusta 15). Hase yeeshee, inkasto heerarka mushahaarada ee shaqada xirfad laaweyaashu ay tartiib u korortay bishii 3aad ee '07 ilaa bishii 12aad ee '08, qiyaastii 110-130%, haddana mushahaarada korortay kuma filla inay daboosho sicir bararka sare ee qiimaha cuntada, awoodda wax iibsiguna weli si weyn ayay uga hoosaysaa sida caadiga ah.

**Jaantuska 15: Celceliska Heerarka Mushahaarada, qiimaha Dalagga iyo Iswaydaarsiga Ganacsiga ee Dalag Lagu Beddelanyo Shaqo ee gobollada Dhexe, Koonfurta iyo Waqooyi-bari**





Iyadoo dakhligu uu awoodi waayay inuu daboolo kharashka qiimaha cuntada iyo waxyaabaha kale ee loo baahanyahay ee kordhay, saboolka magaalooyinka waxa khasab ku noqotay inay raadsadaan taageero lacageed oo dheeraad ah oo ah lacag naqad ah, deyn iyo xawaalado. Tusaale ahaan, bishii 3aad ee '07 ilaa bishii 12aad ee '08, xawaaladaha iyo deeqda naqadka ah ee ay heleen dadka saboolka ah ee magaalooyinku waxay kordheen 159% iyo 565%, siday u kala horreeyaan. Markii la gaaray bishii 12aad ee '08, kaalmada lacagta ahi waxay dabooshay 15-35% ee kharashka ugu yar ee suuqa ay wax kaga soo iibsan karaan saboolka magaalooyinka ee gobollada waqooyi-bari, dhexe iyo koonfurta. Kaalmada lacagta ah ee ay raadsadeen waxa dheer, qoysasku waxay ku dhaqmeen xeelado kale oo ay ugu adkaysanayaan dhibaatooyinka la xiriira xiisadda; waxa xeeladahaas ka mid ah inay iibsadaan miro ka jaban kay hore u iibsan jireen, inay iska dhaafaan cunidda cuntada waqtiyada qaarkood iyo inay cunto ka deynsadaan deriska. Tirada qoysaska saboolka ah ee ku dhaqma mid ama ka badan ee xeeladahaas ay ugu adkaysanayaan dhibaatooyinku waxay ka kordheen 32% bishii 10aad ee '07 waxana ay gaareen 59% bishii 10aad ee '08. Awood la'aanta u adkaysiga dhibaatada ee sii kordhaysaa waxay keentay in heerarka kala duwanaanta cuntadu ay hoos u dhaceen, maddaama 20-60% ee qoysaska saboolka ah ee magaalooyinku ay sheegeen bishii 10aad ee '08 inay cunaan ka yar afar kooxood oo cunto ah maalintii.

## REER BAADIYAHA

Inkastoo qiimuhu uu xoogaa hoos u dhacay saddexdii bilood ee u dambeeyey, haddana qiimaha oo ah kii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey wuxuu ku wadaa inuu mija-xaabinayo awoodda saboolka magaalooyinku ay fursad ugu helayaan cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah. Haddii xaaladdu aanay fiicnaan waxa gabaabsi noqon doona badi xeeladaha ay dhibaatooyinka ugu adkaystaan dadka magaalooyinku. Horeba waxa ugu jiraan deyn saboolnimaduna way ku sii badanaysaa, sidaas darteed waxa sii kordhaysa u nuglaatooda dhacdooyinka naxdinta leh iyo xiisadaha kale.

Falanqaynta hubinta cuntada oo ku salaysan hab-nololeed ee isku jirta ee Deyrta 08/09 kadib waxay muujinaysaa xiisad bina-aadamnimo oo xun oo sii socota oo soo food saartay 1,215,000 oo qof oo deggan dhulka miyiga ah ee Soomaaliya (Khariidadda 9). Tirada dadka ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo (GB),** oo dhan 680,000 oo qof, aad ayay uga badantahay tirada dadka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)**, oodhan 535,000 oo qof, taasoo muujinaysa in xiisaddu ay sii qoto dheeraanayso. Xiisaddu way ka sii daraysaa goobo badan, gaar ahaan gobollada Galgaduud, Mudug, Hiiraan, waqooyiga Gedo iyo gobolka Shabeellada Dhexe. Goobahaas 50-70% ee dadweynaha deggan dhulka miyiga ahi waxay ku jiraan **XCHAX** ama **GB**. Qoobaha qaarkood horumar ayaa jira, siiba gobollada Jubbooyinka iyo Shabeellada Hoose, iyo weliba saddexda hab-nololeedee xoola-dhaqatada ugu muhiimsan ee Hawd, Sool iyo Dooxada Nugaal ee waqooyiga. Caddaynta Qoondaynta Xaaladda Cuntada ee isku jirta ee loo diyaariyey gobol kasta iyadoo ku salaysan hab-nololeed waxa laga helyaa Websaytka FSAU.


Khariidadda 8: Saadaasha Dadweynaha Miyiga Bisha 1aad-Bisha 6aad ee '09




### Gedo

Xaaladda hubinta cuntada ee guud way kala duwan tahay waqooyiga iyo koonfurta, inkastoo uu jiro xoogaa horumar ahi qaybo ka tirsan koonfurta, gaar ahaan Baardheera iyo qaybo ka tirsan degmada Ceel Waaq. Xaaladdu way ka sii dartay waqooyiga, roobabkii Deyrta '08/09 oo liitay dartood, soosaarka miraha/firrida oo caadi ka hooseeya, qiimaha dalagga oo sare, iyo awoodda wax iibsiga oo hoos u dhacday. Tirada dadka ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)** way korortay oo waxay gaartay 35,000 oo qof iyadoo kor uga kacday 21,000 oo ay ahayd Gugii '08, iyadoo tirada dadka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** ay hoos uga soo dhacday 78,000 oo qof oo ay noqotay 60,000 Deyrtii '08/09. Waxa intaas dheer, waxa jira 30,000 oo qof oo ah dadka saboolka ah ee magaalooyinka oo iminka ku jira **XCHAX** sicir bararka sii socda dartiis (Sanduuqa 1 iyo Khariidadda 9).

Jaantuska 16: Iswaydaarsiga Ganacsiga ee Gedo (Luuq), Rida Dibaaxa & Shaqo Lagu Beddelanyo dalag (Gallay)




Soosaarka miraha/firrida, xaaladaha daaqa iyo soosaarka xooluhu way liitaan badi gobollada, sbabbtoo ah roobabkii Deyrtii '08/09 oo aad uga hooseeyey caadi. Hase yeeshee waxa sidan ka reebban degmada Baardheer iyo koonfurta degmada Ceel waaq oo ka faa'iidaystay xaaladaha daaqa oo fiicnaaday, soosaarka dalagga oo wanaagsan (87% isku darka guud ee soosaarka dalagga ee gobolkaas), iyo weliba soosaar wanaagsan oo ah miraha/firrida lacagta naqadka ah laga helo iyo fursado shaqaalaha beeraha ah. Koonfurta degmada Ceel Waaq, xaaladaha daaqu way fiicnaadeen taasoo keentay in xaaladaha jirka xooluhu iyo heerarka rimidda xooluhu ay wanaagsanaadeen. Xilliyo isku xigay oo ay roobabkii liiteen dartood, heerarka dhalmada xoolaha ee xilliga Deyrta Roobabka Deyrta '08/09 iyo soosaarka caanuhu waxay ku wadaan inaanay fiicnayn badi gobolkaas, inkastoo heerarka dhalmada riyaha ee bisha 3aad-bisha 4aad ee '09 la filayo inay noqon doonaan dhexdhexaad ama caadi, gaar ahaan koonfurta Gedo. Taranta tirada xooluhu waxay ku waddaa inay liidato iyadoo tirada xooluhu ay weli si weyn uga hoosayso sida caadiga ah badi gobolka Gedo. Soosaarka dalagga oo hooseeya dartiis, fursadaha shaqadu hoos ayay u dhaceen sidaas darteedna dakhligu wuu kooban yahay, marka laga reebo dhulka webiyada ee degmada Baardheere, goobahaas oo soosaarka gallaydu ee Deyrta '08/09 uu yahay caadi. Inkasta oo qiimaha dalaggu uu hoos u dhacay tan iyo bishii 10aad ee '08, welina wuuu sarreeya marka loo eego sannadkii hore iyo weliba celceliska 5 sano. Suuqyada qaarkood, qiimaha xooluhu wuxuu la mid yahay ama ka sarreyaa celceliskii sannadkii la soo dhaafay iyo celceliska 5 sano. Hase yeeshee, awoodda wax iibsigu weli aad ayay u hoosaysaa, oo way ka hoosaysaa celceliskii sannadkii la soo dhaafay iyo celceliska 5 sano, maddaama iswaydaarsiga ganacsiga ee ri' lagu beddelanayo dalag uu sii xumaaday (waxana uu ka yaryahay 50kg/rida dibaaxa), iswaydaarsiga ganacsiga ee ri' shaqo lagu beddelanyo dalag muu fiicnaan (Jaantusta 16). Colaadda sokeeye ee jirtay saddexdii bilood ee la soo dhaafayna waa arrin kale oo si xun u saamaysay fursad-u-helidda cuntada.


Falanqayn isku dhaf ah oo lagu sameeyey macluumaadka ka soo baxay qiimayntii nafaqada ee laga sameeyey Gedo bishii 12aad ee '08, macluumaadka ku saabsan caafimaadka iyo xogta adeegyada quudintu waxay muujinayaan in xaalad nafaqo oo **Aad Halis u ahi** ka jirto dhammaan hab-nololeedyada gobolkaas. Tani waxay tilmaamaysaa in xiisad sii socota haysato dadweynaha xoola-dhaqatada iyo kuwa dhulka webiyada leh iyo in xaaladda dadweynaha beero-iyo-xoola-dhaqatadu ay ka sii dartay lixdii bilood ee la soo dhaafay. Walaaca ugu weyn waxa laga qabaa heerar sare oo nfaqa darro aad

u xun (SAM) oo uu heerkeedu yahay 6.6%, oo la sheegay inay ka jirto dadweynaha xoola-dhaqatada. Xaaladda nafaqada ee sii xumaanaysa qayb ahaan waxa loo aaneeyey inay u sabab yihiin xilliyo is xigay oo soosaarka miraha/firridu uu liitay, soosaarka caanaha oo heeseeya, sicir barar sare, qiimaha cuntda oo kordhay, colaadda sokeeye oo korortay, arrimahaas oo keenay in helitaanka iyo fursad-u-helidda cuntadu ay hoos u dhacday iyo weliba qaababka daryeelka carruurta oo aan fiicnayn. Nabadgelyo-darrada sii socota oo goobaha qaar ku kooban ayaa si xun u qastay gudbinta gargaarka bina-aadamnimada, oo ay ku jirto fursad-u-helidda adeegyada quudinta ee loogu talagalay carruurta nafaqa-darrada xumi ay hayso.

***Jubbada Hoose iyo Dhexe***

Xaaladda hubinta cuntada ee dadweynaha deggan dhulka miyiga ah ee gobollada Jubbooyinku waxay ku wadday inay fiicnaanaysay tan iyo Gugii '07. Waxa lagu qiyaasay in 20,000 oo qof oo sabool ah ku nool miyiga dhulka webiyada ee gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe (10,000 oo qof gobolkiiba) inay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX),** tiradani waxay ka dhigan tahay 31% dadka dhulka webiyada ee saamoobay Gugii '08. 7,000 oo qof oo ah dadweynaha deggan dhulka webiyada oo hore ugu jiray **GB** iminka waxay ku jiraan **XCHAX**. 12,000 oo qof oo beero-iyo-xoola-dhaqato ah iyo 2,000 oo qof oo xoola-dhaqato ah oo ku jiray **XCHAX** Gugii '08 iminka waxay ku jiraan xaaladan **Hubin La'aan Cuntada ah**. Inkasta oo ay xaaladda dadwynaha dhulka miyigu ay hore u martay, dadka saboolka ah ee magaalooyinku waxay ku wadaan inay halgan kula jiraan sicir barar, 70,000 oo qof ayaan weli ku jira **XCHAX**. (Sanduuqa 1 iyo Khariidadda 1)

**Jaantuska 17: Iswaydaarsiga ganacsiga ee Jubbooyinka, Shaqo lagu Beddelanayo Dalag (Gallay)**





Xaaladda hubinta cuntadu hore ayay u maraysaa dadweynaha ku nool dhulka miyiga taasoo ay u sabab yihiin arrimo isbiirsaday. Heerarka soosaarka dalagga iyo fursadaha shaqadu way fiicnaadeen, sababtoo ah soosaarkii xilligii Guga '08 iyo kii Deyrtii '08/09 iyo laba xilli oo goynta miraha xilliga caadiga ah ka baxsan (Bishii 9aad –bishii 11aad ee '08 iyo mid la filyo bisha 3aad-4aad ee '09) dartood. Isku darka guud ee soosaarka dalagga ee ka soo baxay afartaasi xilli waxa lagu qiyaasay 18,350 MT, kaasoo ka dhigan 90% celceliska dagaalka kadib ee soosaarka sannadkii. Falanqaynta heli-taanka dalagga kaydka ah ee gobollada jubbooyinku waxay muujinaysaa in kaydku uu jiri doono ilaa 6 bilood, taasoo ku xiran degmada. Dhammaan dhasheegyadu dib ayay u buuxsameen, taasoo keenaysa tiro badan oo cuntada iskeed u baxda ah, fursado kalluumaysi iyo weliba soo saarka miraha/firrida lacagta naqadka ah laga helo. Iswaydaarsiga ganacsiga ee u dhexeeya shaqada iyo dalaggu wuxuu kordhay 130% tan iyo bishii 7aad ee '08. Iswaydaarsiga ganacsiga ee u sarreeya ee ka dhexeeya shaqada iyo dalagga koonfurta Soomaaliya waxa laga diiwaangeliyey gobollada Jubbooyinka waana 11kg/mushahaarada shaqada ee maalintii, kaasoo 30-35% ka sarreeya celceliska 5 sano iyo iswaydaarsigii ganacsiga ee bisha 12aad ee '07. Kan waxa u sabab ah heerarka mushahaarooyinka shaqada ee maalintii oo aad u kordhay bishii 12aad ee '08 (130,000 ShSo) iyo qiimaha dalagga gudaha oo si weyn hoos ugu dhacay lixdii bilood ee u dambeeyey. Hase yeeshee, inkastoo uu iswaydaarsiga ganacsigu aad u fiicnaaday lixdii bilood ee u dambeeyey, haddana weli wuu ka hooseeyaa celceliska muddada dheer. Qoysaska beero-iyo-xoola-dhaqatada iyo xoola-dhaqatadu waxay ka faa'iidaysanayaan daaqa iyo dhirta oo hore u maray badi dhulka miyiga ah, xaaladaha jirka xoolaha iyo soosaarka xoolaha oo wanaagsan maaddama tirada dhammaan noocyada xooluhu ay ka sarrayso heerarka caadiga ah (Jaantusta 17).

Falanqaynta xaaladda nafaqada ee isku dhafan ee Deyrta '08/09 horumar ayay muujinaysaa dadka beero-iyo-xoola-dhaqatada iyagoo ka soo degay xaalad **Halis ah** oo la diiwaan geliyey Gugii '08 kadib, waxaana ay noqotay xaalad **Adag** Deyrta '08/09, waxa sidan ka reebban dadweynaha xoola-dhaqatada ah oo xaaladooddu ay ku waddo inay tahay mid **Adag** tan iyo Gugii '08. Arrimaha u sababta ah sidan waxa ka mid ah fursad-u-helidda caanaha oo kororay (caanahaas oo ka soo baxay xoolahood iyo xoolaha u soo guuray Jubbooyinka ee ka yimi gobollo kale labadaba), fursad-u-helidda kalluunka ka soo baxa goobaha ay daadadku ka dhaceen oo korortay iyo dakhli ka soo baxay fursado shaqo oo dheeraad ah. Dadweynaha dhulka webiyada, inkasta oo heerarka nafaqa-darrada guud ay ka hooseeyaan heerka gurmadka, haddana waxa jira heerar sare oo nafaqa-darro xun ah oo keenay inay ku jraan xaalad nafaqo oo **Halis ah**. Fursad-u-helidda biyo nadiif ah, adeegyada faya-dhowrka iyo adeegyada caafimaadka oo kooban ayaa ka hortaagan dadku inay dib uga soo kabtaan xiisadda nafaqada. Dadka ku barakacsan Kismaayo waxay ku wadeen inay ku jireen xaalad **Halis ah** taniyo Deyrtii '07/08.

***Baay iyo Bakool***

Xaaladda hubinta cuntada ee dhammaan hab-nololeedyada Bakool xoogaa ayay hore u martay. Hase yeeshee xaaladda gobolka Baay weli waxa ka jira **Hubin La'aan Cuntada ah,** waxa sida ka reebban waqooyiga Baydhaba oo xaaladdu ay ka sii darayso kadib xilliyo is xigay oo aan lagu guulaysan miraha/firrida. Qaar ka mid ah qoysaska beero-iyo-xooladhaqatada ee deggan goobahaasi xaaladdoodu way ka sii xumaatay **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** waxana ay noqotay **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)**. Gobolka Baay, 4,000 iyo 1,000 oo qof ayaa iminka ku jira **XCHAX** iyo **GB**, siday u kala horreeyaan. Gobolka Bakool, isku darka guud ee tirada dadka ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)** iyo **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** waxay hoos u dhacday 16%, iyadoo tirada ku jirta **GB** ay gaartay 45,000, tirada dadka ku jira **XCHAX** waxay gaartay 80,000 oo qof. Waxa intaas dheer, sicir barar sare oo sii socda dartiis, qiyaastii 60,000 oo ah dadweynaha magaalooyinka ee Baay iyo Bakool ayaa weli ku jira xaalad ah **XCHAX** (Sanduuqa 1 iyo Khariidadda 1).

**Jaantuska 18: Iswaydaarsiga ganacsiga ee Baay & Bakool,** Rida Dibaaxa oo Lagu Beddelanayo Dalag (Hadhuudh/maseggo)




Roobabkii Deyrta '08/09 ee ka da'ay Bakool waxay keeneen in xaaladaha miraha iyo seeruhu ay wanaagsanaadeen. Soosaarkii Deyrta '08/09 wuu ka sarreeyey celceliska dagaalka kadib iyo celceliska 5 sano labadaba, marka laga reebo goobo yar (eeg Qaybaha Beeraha iyo Xoolaha). Xaaladaha seeraha iyo jirka xooluhu way fiicnaadeen iyadoo heerarka rimidda ee dhammaan noocyada xooluhu ay yihiin dhexdhexaad ama sarreyaan; heerarka guuritaanka ka baxsan gobolku way hooseeyaan. Hase yeeshee, tirada xoolaha ay haystaan xoola-dhaqatada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatadu weli

aad ayay uga hoosaysaa heerarka caadiga ah sababtoo ah dhowr xilli oo qallalaa iyo tirada xoolaha la iibiyey oo sarraysay. Gobolka Baay, roobabkii Deyrta ‘08/09 oo sida ay u da’een ay isku jirtay darteed, soosaarka dalaggu wuu ka hooseeyaa celceliska dagaalka kadib iyo celceliska 5 sano. Hase yeeshee, inkastoo uu soosaarku hooseeyo haddana kaydka yaallaa wuu ka badan yahay dalagga loogu baahan yahay in la isticmaalo ee gobolkaas, waxa uu keeni doonaa fursad lagu iibiyo lixda bilood ee soo socda. Qiimaha dalaggu inkastoo uu joogo heerarkii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey, haddana hoos ayuu u dhacayay tan iyo bishii 7aad, taasoo hore u marisay awoodda wax iibsiga ee xoola-dhaqatada iyo beero-iyo-xoola-dhaqatada (Jaantusta 18). Inkasta oo arrimahaas horumarka ahi ay jiraan, haddana fursad-u-helidda cuntada ee qoysas badan oo sabool ah oo ku nool goobaha saamoobay ee Bakool iyo waqooyiga degmada Baydhaba weli way aydkaan doontaa lixda bilood ee soo socda.

Inkasta oo qiimayn nafaqada ah aan dhowaan laga samayn gobollada Bakool iyo Baay colaadda sokeeye darteed, haddana falanqayn isku jirta oo lagu sameeyey warka nafaqada ee la hayaa waxay muujinaysaa in dadweynaha beero-iyo-xoola-dhaqatada ah iyo kuwa xoola-dhaqatada ah ee Bakool laga yaabo inay ku jiraan xaalad nafaqo oo **Aad Halis u ah** iyo in beero-iyo-xoola-dhaqatada Baay laga yaabo inay ku jiraan xaalad nafaqo oo **Halis ah**. Bakool, natiijooyinka ka soo baxay qiimayn degdeg ah oo ah cabirka wareegga cududda (MUAC) oo bishii 12aad ee’08 lagu sameeyey hab-nololeedyada beero-iyo-xoola-dhaqatada iyo xoola-dhaqatadu waxay sheegteen inay jiraan tiro badan (22% iyo 16.6%) oo ah carruur ay nafaqa-darro hayso oo uu cabbirkoodu yahay MUAC <12.5cm ama cagabarar. Xogta ku saabsan carruur loo xushay in quudin iyo nafaqayn lagu sameeyey oo la dhigay xarumaha caafimaadka oo ay haysay nafaqa-darro aad u xun ama mid dhexdhexaad ahi waxay muujinaysaa in tiro badan oo isbedbeddalaysa isla markaana sii kordhaysaa inay ka jirto degmooyinka Waajid iyo Tiyeglow labadii bilood ee u dambeeyey. Xogta xarumaha caafimaadku waxay muujisay heerar sare iyo tiro sii kordhaysa oo ah carruur ay hayso nafaqa-darro guud saddexdii bilood ee u dambeeyey. Gobolka Baay, natiijooyinka ka soo baxay qiimayn degdeg ah oo ah cabirka wareegga cududda oo la sameeyey bishii 12aad ee waxay muujinaysaa tiro sare (17.7%) oo ah carruur ay nafaqa-darro guud hayso iyo 2% uu cabirkoodu yahay MUAC <11.0cm ama cagabarar. Xogta Qaamka Warka Caafimaadka ee ka soo baxday xarumaha caafimaadku waxay muujinaysaa inay jiraan isbeddlo muujinay tiro sii kordhayso oo sare oo ah carruur ay nafaqa-darro guud hayso degmooyinka Baydhaba, Berdaale iyo Qansaxdheere. Fursad u helidda adeegyada quudinta iyo nafaqayntu way jirtaa laakiin way kooban tahay dhulka miyiga ah. Xogta ka soo baxday xarumaha quudinta iyo nafaqayntu waxay muujinaysaa inay sarreeyaan heerarka carruurta la dhigo xarrumahaasi.



*Dumar xamaalaya gallaydii deyrtan soo go'day, Qoryoolay, Shabeellada Hoose, Bisha 10aad ee ‘08.*

***Shabeellada Hoose iyo Dhexe***

Xaaladda hubinta cuntada ee gobollada Shabeellada Dhexe iyo Hoose way isku jirtaa, iyadoo gobolka Shabeellada Hoose uu muujinyo xoogaa horumar ah, gobolka Shabeellada Dhexena ay soo food saartay inuu ka sii darayo. Gobollada Shabeellooyinka, isku dar guud oo ah 465,000 oo qof ayaa ku jira xaalada ah **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)** iyo **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX),** iyadoo heer digniin hore oo **Indho Ku Hayn ah** ay ku jirto Shabeellada Hoose, Shabeellada Dhexe ay halis dhexdhexaad ah ugu jirtay inay gasho xaaladdan lixda bilood ee soo socda; tani waxay ka dhigan tahay hoos u dhac ah 21% taniyo Gugii ’08 ka dhib. Isku darka guud ee dadka saamoobay ee ku jira **GB** waa 235,000 oo qof (taasoo ka dhigan 11% hoos u dhac ah taniyo bishii 7aad ee ’08), tirada dadka ku jira **XCHAX** waa 230,000 oo qof (taasoo ka dhigan hoos u dhac ah 28% taniyo Gugii ’08). Shabeellada Dhexe, 260,000 ee qof ee ku jira **XCHAX** ama **GB**, 67% waa beero-iyo-xoola-dhaqato; 7% waa dadka dhulka webiyada; 10% waa xoola-dhaqato, 12%na waa dadka saboolka ah ee magaalooyinka. Shabeellada Hoose, inta badan ee dadka, ama 40% dadka saamoobay waa saboolka magaalooyinka; 36% waa beero-iyo-xoola-dhaqato; 10%waa dadka dhulka webiyada; 4%na waa xoola-dhaqato. Shabeellooyinka isku darka guud ee dadka magaalooyinka ee weli ku jira **GB** waa 15,000 oo qof, iyadoo 95,000 oo kalena ay ku jiraan **XCHAX**, taasoo ay la socoto digniin hore oo ah **Indho Ku Hayn** (Sanduuqa 1 iyo Khariidadda 1).


Xaaladda dadweynaha deggan dhulka miyiga ah ee Shabeellada Dhexe way ka sii dartay taasoo ay u sabab yihiin dhowr arrimood oo ay ku jirta roobabkii Derytii ’08/09 oo aad u yaraa, kuwaas oo ka dambeeyey roobabkii Gugii ’08 oo liitay, dhowr xilli oo soosaarka miraha/firridu uu caadi ka hooseeyey (Deyrtii ‘08/09: 46%; Gugii ’08: 32%; Gugii ’07: 46%; iyo Deyrtii ‘06/07: 51% ee Celceliska Dagaalka Kadib), kharashka la geliyo beeraha oo sarreyey, sicir bararka sare ee sii socda iyo daaqa oo aad u dhammaaday oo keenay in xooluhu ay gobolkaas ka guuraan. Waxa intaas dheer colaaddaha sokeeye ee sii kordhay oo keentay in dad badan oo ka qaxay magaalooyinku ay ku barakacsan yihiin dhulka miyiga ah ee gobolladaas, taasoo ku wadda inay culays saarayso khayraadka dhulka miyiga ah ee horeba u koobnaa. Kaydka cuntada qoysasku wuu dhammaaday xilliyo is xigay oo miraha/dalagga aan lagu guulaysan dartood. Inkasta oo awoodda wax iibsiyga (iswaydaarsiga ganacsiga ee shaqo lagu beddelanayo dalag) ee qoysaska saboolka ahi xoogaa ayuu kordhay saddexdii bilood ee u dambeeyey goob badan (celceliska 6 kg/heerka mushahaarada maalintii ee bishii 12aad ee ‘08), haddana weli wuu ka hooseeyaa iswaydaarsiga ganacsiga ee bishii 1aad ee ’07, oo ahaa 13 kg/heerka mushahaarada maalintii. Waxa kale oo uu aad hoos ugu dhacay suuqa Aadanyabaal, isagoo ka soo dhacay 5kg dalag/heerka mushahaaradda ee maalintii ee bishii 7aad ee ’08 waxana uu noqday 1kg/heerka mushahaarada maalintii oo keliya bishii 12aad ee ‘08.

Shabeellada Hoose, inkastoo soosaarka miraha/firrida ee Deyrtii ‘08/09 uu caadi ka hooseeyo (36% ee Celceliska Dagaalka Kadib), xaaladda hubinta cuntadu way fiicnaatay, taasoo ay u sabab yihiin arrimo isbiirsaday oo ay ka mid yihiin soosaarkii dalagga ee xilligii Guga ’08 (33,000MT), Soosaarkii Deyrtii ‘08/09 (13,000MT), iyo goyntii miraha xilliga caadiga ah ka baxsanaa ee bishii 10aad ee ’08 oo aad u wanaagsanaa (18,500MT). Tan iyo bishii 7aad ee ’08 iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya shaqada iyo gallaydu wuxuu fiicnaaday 100% suuqyada ugu waaweyn dhulka webiyada ee Shabeellada Hoose sababtoo ah fursadaha shaqada oo fiicnaaday, heerarka mushahaarooyinka shaqada oo kordhay iyo qiimaha dalagga gudaha oo hoos u dhacay dartood.

Xaaladda nafaqada waxa ka muuqda horumar weyn marka la eego beero-iyo-xoola-dhaqatada iyo dadka gudaha dalka ku barakacsan ee jooga goobahaas (waddada Marka-Afgooye) iyadoo ay xaaladda dadkaas hoos uga soo dhacday **Halis** oo ay ku jireen Gugii ’08 oo ay noqotay xaalada **Adag** Deyrtii ‘08/09. Dadweynaha dhulka webiyadu waxay ku jiraan xaalada **Adag** oo sii socota taniyo Gugii ’08.Wax qabadyada bina-aadamnimada (oo ay ku jiraan gudbinta cunto, lacag naqad ah, iyo fursad u helidda biyo nadiif ah iyo faya-dhowr oo sii korodhay), goyta xilliga caadiga ka baxsan oo fiicnayd iyo fursad-u-helidda kalluunka, khudradda macaan iyo khudradda cagaaran oo sii korodhay waxay hagaajiyiyeen xaaladdii nafaqada ee hore ee ahayd **Halis**. Si kasta ha ahaatee, dhacdooyinka cudurra oo sarreeya iyo colaadda sokeeye waxay ku wadaan inay yihiin arrimo sii

xumaynaya xaaladda nafaqada ee aan horeba u fiicnayn. Waxa walaac laga qabaa tirada sare ee sii socota ee ah dhacdooyinka caga-bararka, oo gaar ahaan saamaynaysa dadka gudaha dalka ku barakacsan (1.0%) iyo dadweynaha dhulka webiyada (1.1%), iyo barakaca sii socda ee qoysaska nugul ee ka soo qaxaya magaalada Muqdishu, barkacaas oo culays ku hayaan bulshooyinka martida loo yahay. Magaalada Muqdishu, xaaladda nafaqadu waxa laga yaabaa inay tahay mid **Aad Halis u ah** taasoo ku salaysan falanqaynta isku jirta ee caddaynta natiijooyinka muhiimka ah, Iyadoo ay isbeddello waaweyn dhaceen labadii sannadood ee u dambeeyey.

**Jaantuska 19: Isbeddellada Qiimaha Hadhuudhka/Maseggada ee Gobolka Hiiraan**




***Hiiraan***

Xaaladda hubinta cuntada ee guud ee gobolka Hiiraan way ka sii daraysay tan iyo Gugii '08. Sidaas darteed, tirada dadka ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)** ee deggan dhulka miyiga ahi waxay ka sii korortay 113,000 oo qof iyadoo gaartay 135,000 oo qof, tiradaas korortay waxay ka dhigan tahay 19**%.** Tirada dadka ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** iyo **GB** iyana way korortay tan iyo Gugii '08, iminkana waxay joogtaa 200,000, taasoo ka dhigan 75% dadweynaha deggan dhulka miyiga ah ee gobolkaas, qiyaastii 68% waxay ku jiraa **GB**, 32%na waxay ku jiraan **XCHAX**. Arrimaha doorka ka ciyaara xaaladdan sida xun uga sii dartay waxa ka mid ah soosaarka miraha/firrida oo liita kadib roobabkii Deyrtii '08/09 ee caadiga ka hooseeyey, colaadda soo noqnoqonaysa ee ka jirta magaalooyinka iyo miyigaba, iyo howlaha ganacsiga iyo dhaqaalaha oo qasmay. Hab-nololeedka sida ugu xun u saamoobay waa beero-iyo-xoola-dhaqatada, oo 75,000 oo qof ay iminka ku jiraan **GB ,** 37,000 oo qofna waxay ku jiraan **XCHAX.** Tan waxaa kusoo xiga dadka ku nool dhulka webiyada, halkaas 27,000 oo qof ku jiraan GB**.** Tan iyo bishii 7aad ee '08, xaaladda bina-aadamnimada ee hab-nololeedyada xoola-dhaqatada ee Hawd iyo Koonfurta Guduhu waxay ku jiraan siday hore u ahaayeen: 22,000 oo qof iyo 9,000 oo qof ayaa ku jira **GB**, siday u kala horreeyaan. Dadka saboolka ah ee magaalooyinku waxay ku wadaan inay halgan ugu jiraan sidii ay u dabooli lahaayeen baahidooda cuntada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah qiimaha cuntada ee jooga heerkii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey dartiis.Dadwynaha magaalooyinka ee saamoobay waa sii hore tan iyo bishii 7aad ee '08;20,000 oo qof waxay ku jiraan **XCHAX**, 5000 oo qofna waxay ku jiraan **GB** (Sanduuqa 1 iyo Khariidadda 1).

Soosaarka dalagga waxa lagu qiyaasay 4,500MT, waana 188% ee soosaarkii Deyrtii '07/08, 67% ee Celceliska Dagaalka Kadib (1995-2007) iyo 89% ee celceliska 5 sano (2003-2007). Badi soosaarkani (75%) wuxuu ka soo baxay degmada Beledweyne, oo ka faa'iiday qalabka waraabinta iyo soosaarka miro/firri waadiga laga waraabiyey. Marka loo eego qiimihii bishii 12aad ee '07 iyo qiimihii bishii 12aad ee '08 iyo celceliska 5 sano, qiimaha dalaggu wuu kordhay laakiin wuxuu muujinayaa isbeddel ah inuu hoos u soo dhacayo laga billaabo bishii 7aad ee '08 ilaa bishii 12aad ee '08. Iswaydaarsiga ganacsiga ee shaqada oo dalag lagu beddelanyaa waxa ka muuqday xoogaa horumar ah oo ka dhigan 107% iyo 45% bishii 12aad ee '08, marka la barbar dhigo siduu ahaa bishii 7aad ee '08 iyo bishii 12aad ee '07, siday u kala horreeyaan, laakiin weli wuu hooseeyaa marka loo eego celceliska 5 sano. Xilligii afraad ee afar xilli oo isku xigay ayaa lagu guulaysan waayay miraha/firrida degmooyinka Buulo Burti iyo Jalalaqsi taasoo keentay in si weyn ay cuntadu uga yaraatay badi bulshooyinka deggan miyiga iyo magaalooyinka. Waxa intaas dheer, ka'aanta fursado dakhli laga helo, tirada xoolaha suuqa loo iibgayn karo oo hoos u dhacday iyo sida sii socota ee loo bixinayo deynta biirtay oo ku wadda inay mija-xaabinayso awoodda ay qoysaska magaalooyinka iyo miyigu ku iibsanayaan cunto.

Xaaladda nafaqada ee dhammaan hab-nololeedyada Hiiraan waxay muujinaysaa in laga yaabo inay sii soconayso xaalad nafaqo oo ah **Halis** oo jirtay tan iyo Gugii '07. Inakstoo aanay jirin xog qiimaynta ah oo ka wakiil noqon karta oo lagu samayn karo qoondayn qayaxan, haddana xogta jirtaa waxay ku talinaysaa xaaladdu inaan laga yaabin inay iska beddesho siday ahayd Gugii '08. Falanqaynta lagu sameeyey xogta ka soo baxday xar-rumaha caafimaadku waxay ku waddaa inay muujinayso tiro sare oo ah carruur ay nafaqa-darro hayso, iyadoo ay jiraan isbeddello isku jiraa: goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada nafaqa-darradu hoos ayay u dhacaysaa, goobaha xoola-dhaqatada halkeeda iskamay beddelin, dhulka webiyadana way sii kordhaysaa, waxaana ay halis ugu jiraan dadka dhulka webiyadu in xaaladdu ay ka sii darto. Xogta ka soo baxday Barnaamijyada Quudinta ee ay maamulaan hay'adaha aan dawliga ahayn ee caalmiga ahi ee ku yaalla Buulo Burti iyana waxay muujinayaan inay sii kordhayso tirada carruurta la dhigayo xarrumahaasi. Xaaladda nafaqada ee ah **Halis** ee gobolka Hiiraan waxa loo aanaynayaa inay badi u sabab tahay xiisadda hubinta cuntada ee sii socota, heerka sare ee nuglaanta xagga nafaqada ee joogtada ah iyo fursad-u-helidda bina-aadamnimada oo kooban.

***Gobollada dhexe***

Xaaladda guud ee hubinta cuntada ee gobollada dhexe ee ay abaartu saamaysay (Galgaduud iyo Mudug) way ka sii dareen taniyo Gugii '08. Xiisaddani waa mid aad u xun, iyadoo qiyaastii 350,000 oo qof oo ah xoola dhaqato iyo beero-iyo-xoola-dhaqato deggan dhulka miyiga ah iyo 55,000 oo ah dad magaalooyinka deggani ay ku jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** ama **Gurmd Bina-aadamnimo**. Dad ka badan kala badan isku darka guud ee dadweynaha labadaas gobol ayay xiisadi haysataa. Waxa intaas dheer, waxa jira 200,000 oo qof oo gudaha dalka ku barkacsan, arrintan oo ay keentay colaadda sokeeye ee sii kordhaysa ee ka jirta gobollada Shabeellooyinka iyo qaybo ka tirsan gobollada dhexe. Tirada dadka ku jira **GB** way sii korortay hab-nololeedyada Cadduun, Hawd, Xeebta Deex iyo dhulka haruurka/maseggada ugu badan laga beero, waxaana jirta digniin oo ah inay halis dhexdhexaad ah ugu jiraan in tirada dadka ku jira **GB** ay ka sii darto intaan la gaarin dhammaadka bisha 6aad ee '09. Taniyo Gugii '08, tirada dadka ku jira **GB** ee gobolka Galgaduud waxay korortay 41% (iyadoo kor uga kacday 117,000 noqotayna 165,000), koonfurta Mudugna waxay korortay 27% (iyadoo ka kacday 55,000 gaadhayna 80,000). Xaaladdan ka sii daraysa waxa u sabab ah siday u da'een roobabkii Deyrta '08/09, oo sii qoto dheereeyey abaarta, colaadda sokeeye ee baahsan oo keentay in tirada dadka barakacsani ay kororto (iyadoo ay ku kordheen 5,000 oo qof). Waxa si gaar ah walaac looga qabaa dhowaan dad ka soo barakacay magaalooyinka Dhuusamareeb iyo Guriceel, barakacaas oo ay keeneen dagaallo sii kordhay oo ka dhexeeya kooxo diini ah oo goobahaas jooga. (Sanduuqa 1 iyo Khariidadda 1)

Gobollada dhexe, roobabkii xilligii Deyrta '08/09 oo caadi ka hooseeyey (50% sida caadiga ah), oo ay weheliso xilliyo isxigay oo hore oo roobabka aan lagu guulaysan oo keenay inay ka sii daraan xaaladaha seeruhu (biyaha iyo daaqa). Xaaladaha jirka xoolaha (xoolaha waaweyn) iyo soosaarkooduba waxay ku wadaan inay liitaan, tirada xooluhuna iminka si weyn ayay uga hoosaysaa heerarka caadiga ah. Goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada ee dhulka digirta ugu badan laga beero, laguma guulaysan miraha/firrida xilligii Deyrta '08/09, taasoo sii xumaysay saamaynta xilliyadii hore ee isxigay ee miruhu ay caadi ka hooseeyeen. Qiimaha dalaggu wuxuu joogaa heerarkii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey Iyo heerkii ugu sarreeyey dham-maan Soomaaliya. Inkastoo Iswaydaarsiga ganacsiga ee Ri lagu beddelanayo dalag uu hore u maray Iixdii bilood ee u danbeeyey, tirada dadka ka faa'iidaystay iswaydaarsiga ganacsigu aad ayay u hoosaysaa, sababtoo ah heerarka hantida xoolaha ee laga xaalufay oo sarreeya abaarta darteed.

Aad ayay u yar tahay tirada xoolaha suuqa loo iibgayn karaa, qoysaskuna waxay ku wadaan inay ku tiirsanaadaan qaabab ay dhibaatada ugu adkaysanayaa sida inay amaah ama deyn wax ku iibsadaan.




*Xaaladaha jidhka geela oo liita, Dhuusamareeb, Bisha 12aad '08*

Falanqaynta nafaqada ee isku jirta ee Deyrta '08/09 kadib ee FSAU waxay muujinaysaa xaalad nafaqo oo walaac weyn lihi inay ka jirto labada hab-nololeed ee ugu waaweyn xoola-dhaqatada ee gobollada dhexe. Hab-nololeedka xoola-dhaqatada ee Hawd xaaladda nafaqadu way ka sii dartay oo waxay noqotay mid **Aad Halis u ah** iyadoo kor uga kacday xaalad ah **Halis** oo ay ku jirtay Gugii '08, sidii la saadaaliyey. Xaaladdan ka sii dartay waxa u sabab ah arrimo is biirsaday oo ay ku jiraan xiisadda hubinta cuntada ee sii socota, barakaca sii socda, Shuban biyood xun oo aan ilaa hadda la xakmayn oo dillaacay, fursad-u-helid la'aan buuxda oo la xiriirta adeegyada lagama maarmaanka ah iyo gargaarka bina-aadamnimada oo aanay haysan dadka saamoobay. Hab-nololeedka Cadduun waxa laga soo sheegay xaalad nafaqo oo Halis ah oo sii socoto, taasoo halis ugu jirtay inay ka sii darto, tilmaameyaasha hubinta cuntada ee sii xumaynaysa iyo la'aanta gargaarka bina-aadamnimada dartood. Falanqaynta haddu waxay qiyaasaysaa inay jiraan 10,000 oo carruur oo ay nafaqa-darro xumi hayso oo da'doodu ay ka yartahay 5 sano oo jooga gobollada Galgaduud iyo Mudug, carruurtaas oo halis ugu jira inay dhintaan haddii aanay helin daaweyn habboon. Hase yeeshee, howlaha bina-aadaminada ee ka jira goobahaas oo sii yaraanaya dartood, howlaha lagama maarmaanka ah ee badabaadinta nolosha waa la yareeyey, baahidana lama fuliyo.

***Waqooyi-bari***

Waqooyi-bari, xaaladda hubinta cuntada ee dadweynaha xoola-dhaqatada ah ee koonfurta Nugaal iyo waqooyiga Mudug way ka sii dartay tan iyo Gugii '08, sababtoo ah xilli roobaad kale ayay roobabku liiteen (Roobabkii Deyrtii '08/09 waxay ahaayeen 20-40 % celceliska muddada dheer) iyo sicir barar sii socda. Tirada dadka xoola-dhaqatada Hawd ee gobollada Mudug iyo Nugaal ee ku jira **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** way korortay tan iyo Gugii '08**,** waxana ay halis dhexdhexaad ah ugu jiraan inay galaan xaalad ah **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)**. Xoola-dhaqatada Cadduun, oo Gugii '08 ku jiray **Hubin-La'aan Cuntada ah** oo halis dhexdhexaad ah ugu jiray inay galaan xaalad ah **XCHAX,** iminka waxay ku jiraan **XCHAX.** Dadka saboolka ah ee magaalooyinku waxay ku wadaan inay halgan kula jiraan sicir barar sare, qiyaastii 130,000 oo qof ayaana weli ku jira xaalad ah **XCHAX** dhammaan waqooyi-bari, marka laga reebo magaalada Boosaaso oo ay jiraan qayb ka mid ka dadka saboolka ah ee magaaladaas deggan oo ku jira **GB**. Isku darka guud ee dadweynaha ku jira **XCHAX** iyo **GB** ee jooga gobollada waqooyi-bari ee Bari, Nugaal iyo waqooyiga Mudug waa 195,000 oo qof, 130,000 oo ka mid ahi waa dadka magaalooyinka deggan, 65,000 oo qofna waa xoola-dhaqato deggan dhulka miyiga ah. Isku darka guud ee tirada saamoobay, 81% waxay ku jiraan **XCHAX** 19%na waxay ku jiraan **GB**. Waxa intaas dheer, waxa jira dad cusub oo soo barokacay iyo dad muddo dheer barokacsanaa oo u baahan gargaar bina-aadamnimo. (Sanduuqa 1 iyo Khariidadda 1)

**Jaantuska 20**: **Iswaydaarsiga ganacsiga ee Waqooyi-bari, Rida Dibaaxa & Shaqo Lagu Beddelanayo dalag (Bariis)**




Daaqa iyo biyuhu waxay ku wadaan inay aad u liitaan hab-nololeedyada xoola-dhaqatada ee Hawd iyo Cadduun ee gobollada Mudug iyo Nugaal saddex xilli roobaad oo ay roobabku liiteen dartood (Deyrtii '07/08, Gugii '08 iyo Deyrtii '08/09). Sidaas darteed, badi barkaduhu way maran yihiin, ceelashuna dayactir ayay u baahan yihiin. Biya-la'aantu waxay keentay in biyo dhaamis hore u billaabmay iyo in qiimaha biyuhu uu kacayo (iyadoo uu qiimuhu ka kacay 3,000-4,000 ShSo/20 litir bishii 12 ee '08). Badi xoola-dhaqatada hab-nololeedka Hawd ee hadhay waxay u guureen gobolka Soomaalida ee Itoobiya, iyadoo xoola-dhaqatada Cadduun ee degmada Jarriban ay u guureen Hawdka degmada Eyl. Daaqa iyo dhirta Sool, Dooxada Nugaal iyo Hawdka Eyl si buuxda ayay dib ugu soo cusboonaadeen, roobabkii Deyrtii '08/09 oo caadi ahaa ama wanaagsan dartood oo soo jiitay xoolaha hab-nololeedyada deriska ah. Qiimaha dalagga dibedda laga keeno iyo ka guduhu wuxuu ku wadaa inuu joogo heerarkii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey, inkastoo uu hoos u dhacay tan iyo bishii 7aad ee '08. Qoysas badan, gaar ahaan kuwa saboolka ah, ayaa ka wareegay bariiska dibedda laga keeno oo u wareegay dalagga gudaha ee ka jaban si ay u dhimaan kharashka. Hase yeeshee, qiimaha gallayda iyo haruurka/maseggadu, si weyn ayuu u kordhay oo ka dhigan 146% (gallayda) iyo 104% (hadhuudhka/maseggada) bishii 12aad ee '07 ilaa bishii 12aad ee '08, 190% iyo 179% ayaanu ka sarreeyaa celceliska 5 sano ee bisha 12aad, siday u kala horreeyaan. Awoodda wax iibsiga ee bulshooyinka xoola-dhaqatada iyo magaalooyinkuba hoos ayay u dhacday. Iswaydaarsiga ganacsiga ee Rida daabaxa ah oo lagu beddelanayo bariis 17% ayuu ka hooseeyaa siduu ahaa bishii 12aad ee '07 (isagoo hoos uga soo dhacay 42.11kg/neefkii noqdayna 35.15kg/neefkii), 45% ayaanuu ka hooseeyaa celceliska 5 sano. Rida dhoofinta waxa lagu beddeshaa 38.11kg oo bariis ah, 19% ayaanu ka hooseeyaa iswaydaarsiga ganacsigu siduu ahaa bishii 12aad ee '07.

Iswaydaarsiga ganacsiga ee shaqo lagu beddelanayo dalag 19% ayuu ka hooseeyaa siduu ahaa bishii 12aad ee '07, 51% na wuxuu ka hooseeyaa celceliska 5 sano ee bisha 12aad. Falanqaynta xaaladda nafaqada ee isku jirta ee Deyrta '08/09 kadib lama diiwaan gelin isbeddello waaweyn oo ku saabsan xaaladda nafaqada ee badi hab-nololeedyada gobollada waqooyi-bari tan iyo Gugii '08 marka laga reebo hab-nololeedka Hawd (gobollada Mudug iyo Nugaal) oo ka sii daray halkii uu joogay Gugii '08 ee ahayd xaalad ah **Halis** waxana uu galay xaalad **Aad Halis u ah**, hab-noleedyada Golis/Gaagaabna way ka wanaagsanaadeen xaalad **Adag** oo ay ku jireen Gugii '08 waxana ay ku jiraan xaalad ah **Feejignaan**. Hab-nololeedka Cadduun waxuu ku waday inuu ku jiray xaalad ah **Halis** tan iyo Gugii '08, waxana uu halis ugu jiraa inay xaaladdu ka sii darto, iyadoo taagga Sool (gobolka Bari) uu ku wado inuu ku jiro xaalad ah **Feejignaan**. Waxa walaac weyn laga qabaa dadka muddada dheer ku barokacsanaa magaalada Boosaaso oo iminka xaaladdooda lagu tilmaamay inay tahay mid **Aad Halis u ah** waxna iskamay beddelin siday xaaladdu ahayd Gugii '08 kadib. Xaaladdan walaaca leh waxa u sabab ah arrimo isbiirsaday oo ay ku jiraan shuban dillaacay, fursad-u-helidda cuntada oo yaraatay qiimaha cuntada ee kordhay dartiis, iyo qaababka daryeelka carruurta oo liita. Natiijooyinku waxay la socdaan xogta baaritaannada nafaqada ee laga sameeyey dadka ku barokacsan gobollada waqooyi-bari, taasoo tilmaamaysa nuglaan xagga nafaqada ah oo joogto ah. La'aanta qaab hab-nololeed oo dhisan oo ay istcimaalaan dadka barokacsan, iyo fursad-u-helidooda guud ee adeegyada lagama maarmaanka ah oo kooban ayaa sii xumaynaya xaaladda nafaqada ee dadka goobahaas ku barokacsan.

***Waqooyi-galbeed***

Xaaladda hubinta cuntadu way fiicnaatay saddexda hab-nololeed ee xoola-dhaqatada ugu waaweyn iyo goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada ee degmada Gabiilay oo lagu tilmaamay inay ku jireen **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** Gugii '08 kadib. Sidaas darteed, iminka waxa lagu tilmaamay inay ku jiraan **Hubin La'aan Cuntada ah.** Hase yeeshee, way ka sii dartay xaaladda xoola-dhaqatada Golis/Guban iyo beero-iyo-xoola-dhaqatada Awdal iyo Galbeed (oo ay ka reebban tahay degmada Gabiilay) oo iminka waxa lagu tilmaamay inay ku jiraan **XCHAX**. Inkasta oo xaaladdu ay ka sii darayso goobahaas, haddana xiisadda haysata dadweynaha deggan dhulka miyiga ahi guud ahaan si weyn ayay u yaraatay, maddaama tirada dadka horumar gaaray ay ka badan tahay ta ay xaaladdoodu ka sii dartay. Qiyaasta dadweynaha deggan dhulka miyiga ah ee ku jira **XCHAX** iminka waa 45,000, waxaana tiradaasi ay hoos uga soo dhacday 125,000 oo qof oo ah intay ahayd Gugii '08. Dadka saboolka ah ee magaalooyinku waxay ku wadaan inay halgan kula jiraan sicir bararka sare, tiradooduna waxay ku waddaa inay la mid tahay heerkii Gugii '08, iyadoo 30,000 oo qof ay ku jiraan **Gurmad Bina-aadamnimo (GB),** 110,000 oo qofna waxay ku jiraan **XCHAX**.

Roobabkii Deyrta '08/09 waxay ahaayeen caadi badi qaybaha waqooyi-galbeed, hase yeeshee goobaha xoola-dhaqatada ee Golis/Guban iyo goobaha beero-iyo-xoola-dhaqatada ee gobollada Galbeed, Awdal iyo Togdheer waxay heleen roobab caadi ka hooseeya. Helitaanka biyuhu guud ahaan wuu wanaagsan yahay ama waa caadi badi gobolladaasi, hase yeeshee, waxa jira goobo ka tirsan Hawdka Hargeisa, Laascaanood iyo qaybta kore ee Dooxada Nugaal ee degmooyinka Caynaba iyo Ceel-afweyn, iyo galbeedka taagga Sool oo helay roobab caadi ka hooseeya, waxaana la filayaa inay soo food saari doonto biyo yaraani xilliga Jiilaalka ee soo socda. Xaaladaha jirka xooluhu way wanaagsan yihiin ama waa caadi, laakiin way liitaan Golis-Guban xaaladaha daaqa oo aan fiicnayn dartood. Dhalmada geelu way hoosaysaa ama ma jirto heerarka rimidda oo hooseeyey xilligii Deyrta '07/08 dartood, taasoo keentay in soosaarka caanuhu uu ka hooseeyo caadi. Deyrtii *'08/*09, heerarka rimidda geelu waxay ahaayeen dhexdhexaad ama way sarreeyeen. Heerarka dhalmada adhigu waxay ahaayeen dhexdhexaad, taasoo ay u sabab tahay heerarka rimidda oo dhexdhexaad ah Gugii '08. Qiimaynta waxa lagu ogaaday in xoogaha ay hoos u dhacday tirada adhigu; hoos u dhacan waxa keenay cudur dillaacay, iyo tirada xoolaha la iibiyey oo korodhay. Hase yeeshee, tirada xooluhu weli way ka saraysaa heerarka caadiga ah marka laga rreebo Golis Guban, oo tirada xooluhu ay 68% ka hoosayso heerarka caadiga. Dakhliga laga helo iibka xooluhu wuu kordhay tan waxa u sabab ah badi baahid loo qabo adhiga dhoofinta oo korodhay xilliyadii Ramadaanta iyo Xajka. Waqooyi-galbeed, goynta midhaha Gugii/Karantii '08 waxa lagu qiyaasay 17,552 Mt, taasoo ka dhigan 70% goyntii Gugii/Karantii '07, 94% Celceliska Dagaalka Kadib iyo 72% celceliska shan sano.Saadka dalagga gudaha ee suuqyada waaweyni wuu ka hooseeyaa caadi soosaarka midhaha/firidda oo liita dartiis, waxana uu ku koobanyahay kayd ka hadhay soosaarkii Gugii/Karantii '07.

Falanqaynta nafaqada ee isku jirta ee xilliga Deyrta '08/09, ee gobollada waqooyi-galbeed, waxay muujinaysaa in hab-nololeedka Golis/Guban uu yahay ka keliya ee si weyn ay xaaladda nafaqadu uga sii dartay iyadoo ka xumaatay xaalad ah **Halis** oo ay ahayd Gugii '08 kadib oo ay noqotay xaalad **Aad Halis u ah** Deyrta '08/09 kadib. Baaritaan nafaqada oo la sameeyey bishii 10aad ee 2008, wuxuu sheegay in heerka nafaqa-darrada guud oo ah **20.7**% iyo nafaqa darro xun (dherarka oo loo eegayo culaysaka <-3 ama cagabarar) oo uu heerkeedu yahay **2.4%** (1.4-3.5). Xaaladdaas nafaqo ee walaac leh waxa badi u sabab ah heerarka cudurrada oo sarreeya, kadib cudurro dilaacay, fursad-u-helidda caanaha oo hoos u dhacday waayo xoolaha ayaa ka guuray gobolkaas, xoolaha oo dhintay roobab baraf leh oo hore u da'ay dartood iyo sicir bararka sare. Hase yeeshee, xaaladda nafaqadu way fiicnaatay goobaha kale ee miyiga ah. Arrimaha ugu waaweyn ee horumarka keenay goobahaasi waxa ku jira fursad-u-helidda caanaha iyo soosaarka kale ee xoolaha oo kordhay iyo xaaladda hubinta cuntada oo guud ahaan wanaagsanaatay.

**Daabacaadaha iyo war saxaafadeedyada dhowaan soo baxay ama soo socda**

*War Saxaafadeedka FSAU, 5ta Bisha 2aad ee 2009*
*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET, Bisha 1aad ee 2009*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET, Bisha 1aad ee 2009*
*Warbixinta Nafaqada ee FSAU, Bisha 11aad - Bisha 12aad ee 2008*
*Warbixinta Taxanaha Farsamada ee FSAU, Falanqaynta Deyrta '08/09 Kadib, Bisha 2aad ee 2009 (Way soo socotaa)*

*XUSID: Daabacaadahaas iyo war saxaafadeedyadaas waxa laga helayaa Websaytka FSAU: www.fsausomali.org*

Technical & Managerial Support
European Commision
Funding Agencies